

Hordhac

Waxaa hubaal ah in inta badan bulshooyinka dunidu ay isku waafaqsan yihiin muhiimadda ay leedahay in qofku kor u qaado aqoontiisa ku aaddan culuumta bani-aadamka, sidoo kale na qofkasta oo adduunkaan ku nool ay waajib ku tahay in uu raad wanaagsan ku yeesho bulshadiisa.

Hadba sida ay bulsha kasta u fahanto arrintaas ay ku xirnaanaysa horumarka ay gaarto, sida kaliya ee aanu horumarkaas ku gaari karnana waa in aan marka hore ka faaidaysannaa waayo aragnimada iyo tijaabooyinka bulshooyinka kale ay smaeeyeen si aan uga sii anbaqaadno ama aanu ka dhigno mid ku habboon hadba baahiyaha gaarka u ah busladeenna.

Si loo gaaro yoolkaas aan kor kusoo sheegnay waxaa laga maarmaan ah in aanu yeellanno dhaqan waxakhris, waayo markasta oo uu akhrsikeennu bato waxaa kordhaysa kartideenna iyo sida aanu diyaar ugu noqonayno xal-uhelidda dhibaatooyinka faraha badan ee sida gaarka ah ka buslho ahaan noo haysta.

Iyada oo ay taas tahay mid ay mudan tahay in aan ka dhigano caqiido aanu ku beerno jiilkeenna, iyada oo aan ka dhiganayno shicaar iyo hal kudhig maahmaahda Soomaliyeed ee cajiibka ah kuna dhisan macna wayn oo falsafi ah “TALA KEEN NOQO AMA TALA RAAC”, waana labada shardi ay ku xirantahay horumarkasta oo ummadi gaarto. Intaas wixii ka soo haray waa in aan ku noqono adduunka dheerad dhib mooyee dheef aan kusoo kordhin.

Hadaba anoo ka duulayaa arrintaas waxaan jeclaystay in aan bulshadayda la wadaago tajrubadii aan ka dhaxlay akhrinta buugaagta waliba waxaan rabaa in aan si gaara idiin la wadaago buug aan akhriyay oo sigaara uga hadlaya xal uhelidda mid kamida dhibaatooyinka haysta ilbaxnimada ummadeenna: Dowladnimada.

Waxaan rajaynayaa in naad ka faaidaysan doontaan koobista aan buuggaan ku sameeyey.

Hordhaca Buugga

Buuggu waxa uu asal ahaan ku qoran yahay luuqadda carabiga waxaana uu mgaciisu yahay “الأزمة الدستورية في الحضارة الإسلامية من الفتنة الكبرى إلى الربيع العربي”, taas oo Soomaali ahaan noqonaysa “Aafada Siyaasadeed ee ilbaxnimada Islaamka: lagasoo bilaabo fidnadii weynayd ilaa gugii Carabta”

Buuggaan wuxuu si kooban uga hadlayaa dhibaataada siyaasadeed ay haysta ilbaxnimada Islaamka, isaga oo tixraac ka dhiganaya Qur’aanka iyo Sunnada Nabiga NNKH, dib u

akhrinna ku samaynay sooyaalkii siyaasadeed ee Islaamka, ujeeddada guud ee uu usocdana ay tahay sidii xal loogu heli lahaa dhibaataada siyaasadeed ee hadda ku geedaaman inta badan dunida Islaamku.

Qoraaga buugga waa Dr. Maxamed Mukhtar Shanqiidi. Shanqiidi waa borofeesor culuumta siyaasadda ku ah xeel dheere waxa uuna darajada PHD ku diyariyay sooyaalka diimaha isaga oo kabaxay jaamacadda Taxes ee dalka Maraykanka. Waa qoraa iyo cilmi baare si gaara ugu xeeldheer arrimaha culuumta bulshada , sida siyaasadda , falsafadda iyo dib uhabaynta diinta ,

Qaybaha buugga

Buuggu waa buug aad u weyn oo mawduuc aad muhiim u ah ka hadlaya, wayna adag tahay in maqaal kooban laga sameeyo buuggan, haddana waxaan isku dayaynaa in aan qaybaha sida gaarka ah muhiimka u ah aan xoogga saarno.

Guud ahaan buuggu waxa uu ka kooban yahy saddex-qaybood, oo qayb walbana ay leedahay cinwaan hoosaadyo

Qaybta koowaad: Qiyamka nidaamka siyaasiga ah ee Islaamka

Qaybta koowaad ee buugga waxa uu qoraagu si faahfaahsan uga hadlay maxay tahay qiyamka iyo mabaadida asalka u ah nidaamka kasta oo siyaasi oo raba in uu nasab sheegto diinta islaamka? Qiyamka iyo mabaadi'da uu qoraagu qaybtaan kusoo aruurshay ma ahan mid uu isagu iska allifay balse waa kuwa dhex uu kasoo dhexsaaray Qur'aanka iyo sunnada, waxa uuna sidoo kale meesha ka marnay in uu si xeeldheer ah uu uga faaidaystay cilmibaarayaashi isaga ka horeeyay.

Waxa uu qaybtaan qoraagu uqaybshay laba qaybood

- **Qiyamka lagu djisayo nidaamka siyaasiga ah ee islaamka**
- **Qiyamka lagu hawlgalinayo nidaamka siyaasiga ah ee islaamka**

Nidaamkasta oo siyaasi ah oo adduunka kajira waxaa muhiim ah in uu kajawaabo weydiimo aasaasi ah oo waligood jiray, hadba sida looga jawaabana ayay ku xiran tahay qaabka uu yeelanayo nidaamkaas siyaasiga ah.

Su'aalahaan waa kuwo ay inbadan iswaydiiyaan filasoofyada adduunka laga soo bilaabo 'Aristotle' ilaa kuwa hada jooga waxaana kamid ah su'aalahaas

1. Baahi maloo qabaa in dadku samaystaan cid sigaara awood uleh oo loo hoggaansamo?

2. Haddi ay jawaabtu ‘Haa’ tahay, sideebay dhab ku noqonaysa in laga dhabeeyo caddaalad ay usiman yihiin dhammaan qaybah bulshada ee u hoggaansamay, maadaama nidaamkaasi bulshada u qaybinaya masuul/hoggaamiye iyo rayid/la-hoggaamiye?
3. Maxay noqonaysa awoodda qofka masuuliyadda hoggaamineed qaadaya?
4. Awooddaasi ma hibo gaar ah oo Alle baxshaa?
5. Awooddaasi ma ammaano xaddidan baa? Ma mulkiyad qofeed?
6. Sideeda ba yaa xaq uleh inuu dadka maammulo?
7. Awooddaas xaggee ka timid oo laga tixraacayaa?
8. Xaggee saldhig/tixraac u ah awoodda dowladnimada ee dadka ku khasbaysa inay u hoggaansamaan?
9. U hoggaansanaanta dowladda xudduud ma leedahay?
10. Hada xudduud leedahay, maxay tahay xudduuddaas?
11. Goormaa la khilaafi karaa? Goormaan se la khilaafi Karin hoggaankaas?

Qoraagu waxa uu buuggiisa ku caddeeyay in qiyamka siyaasiga ah ee islaamku uu si mugweyn uga jawaabay dhammaan su’aalahaas. Wuxuu si cil miyeysan uu kala dhigdhigay halka laga tusaale qaadan karo marka la joogo Islaamka---Ma waxaa tusaale noqon karta wakhtigii Nabiga CSW iyo afartii Khulufu? Mise dowladihii Islaamiga ah sida Reer Binii Ummaya, Cabbaasiyiintii, Faadumiyyiintii iyo tii ugu dambaysay ee Cismaaniyada? Mase waxaa la tusaalaysan karaa dowladaha dunida Islaamka ee maanta Jira? Qoraagu wuxuu ayidayaa in dhammaan afkaaraha iyo nusuusta ba si rasmi ah laga tusaale qaato nusuuta Islaamiga ah ee muqaddaska ah (Qur’aanka iyo Sunnada Nabiga csw).

Haddaba maxay yihiin Qiyamka lagu djisayo nidaamka siyaasiga ah ee Islaamka?

Ka hor jawaabta su’aashaas waxaa jirtay dood uu bilaabay Xilli hada laga joogo 2300 sano faylasoofkii la oran jiray ‘Aristotle’. Dooddaas oo hayd *dantu ma waxay ku jirtaa in qof wanaagsan xukumo dawladda mise in la helo sharci wanaagsan oo u dhexeeye xukumaha iyo la xukumaha?* Waxa uu doortay ‘Aristotle’ in ay dadka iyo dalkuba dantu ugu jirto in la helo sharci wanaagsan.

Sideeddaba laguma qiyaaso da’da dawladda inta uu jiro hoggaamiyaha dawladdaas ama inta ay jirtay ilbaxnimadaas, balse da’da dawladda waxa ay ka dhalataa qori isudhiibka iyo meesha uu hoggaamiye kasta uu ka qaado ama uu geeyo, iyadoo uu shaqaynayn nidaamkii dowladnimo.

Waana midda keentay in Nabigu NNKH uusan cidna uga tagin in ay isaga dabadii dadka xukumaan, taas beddelkeed waxa uu nabigu ka tagay shuruuc, mabaadi iyo qiyam ay

waajib tahay in la ilaasho lana dhaqangeliyo. Waxa uu uga tagay bulshada qawaaniin dhammeystiran oo si wanaagsan u caddaynaya waxa xuquuq lagu leeyahay bulshada Islaamka iyo waajibaadka laga rabo bulshadaas. Si la mid ah wuxuu qeexay Islaamku qofka la raba in uu bulshada hoggaamiyo sida ay tahay in uu u dhaqmo iyo qiyamka iyo mabaadi'da laga rabo in uu ilaasho.

Nabigu NNKH waxa uu doonayey in bulshada Islaamku markasta ay la jaan-qaadaan casriga ay kunoolyihiin kana faa'idaystaan xikmadaha iyo waaya aragnimada bulshooyinka kale, iyadoo markasta lagu duulayo mabaadi'da iyo qiyamka Islaamku dajiyey. Waana arrinta uu qeexayao Nabigu NNKH *“xikmaddu waa baadida mu'minka isaga ayaana leh meel kastaba haka helee”*

Haddaba maadama siyaasaddu ay tahay in laga shaqeeyo danta ummadda lana isku aaddiyo baahiyahooda, taas oo ah mid diinta Islaamku caddaysay kuna soo koobtay ilaalinta maqaasidda shanta ah: Ilaalinta **diinta, nafta, maalka, caqliga iyo sharafta**. Waxaa lagama maarmaan ah inaan isweydiinno maxay tahay wadiiqada, mabaadida iyo qiyamka ay ummadda islaamku utaagan tahy, muhiimna tahay in la dhaqangaliyo si loo ilaaliyo maqaasidaas shanta ee diinteenna bud-dhigga u ah.

Si guud, qoraagu waxa uu sheegay in aysan jirin qiyam la iskuwada waafqsan yahay laakiin ay jiraan mabaadi' guud oo mudantahay in la isku soo aruuriyo.

Cilmibaaraha weyn ee muslimka ee u dhashay Jabbaan Dr. Xasan Koo Nakaata waxa uu soo aruuriyay 25 culimo oo kamid yihiin Sanhuuri, Maxamed abuu Zahra , Maxamed Mubaarak , Cabdiwahaab khilaaf , Wahba Suxayli. Hadda ba fikradaha culimadaan markii la isku soo aruuriyo waxay kusoo aruurayaan 16 mabda' oo bud-dhig u ah dhisamaha nidaam Islaami ah. Waxayna kala yihiin

1. **Wadatashi.**
2. **Caddaalad.**
3. **Sinnaan.**
4. **Xorriyad.**
5. **Addeecid/ u hoggaansamid.**
6. **Walaalnimo.**
7. **axdi”بيعة”.**
8. **midnimo.**
9. **Masuuliyad.**
10. **islaxisabtan.**
11. **Sarraynta Sharciga**
12. **Ilaalinta ummadda**

13. xuquuqda Bani-aadamka.

14. Wax-istarka/ Iskaashiga bulsho.

15. Is-dhammaystirka arrimaha diinta iyo adduunyada.

16. adeegsiga dadka awoodda iyo ammaanada leh.

Qoraaguse isaga oo aan meesha ka saarayn cilmaabirsiyadaas iyo mufakiriintaas iyo sida ay usoo ururiyeen mabaadi'da Islaamku ku dhisanyahay, haddana waxa uu buuggiisa kusoo koobay qiyamka ay mudan tahay in lagu dhiso nidaam kasta oo siyaasi ah oo raba in uu u nasab sheegto diinta Islaamka ama la dhihi nkaro waxa uu waafaqsan yahay nidaamkii uu Nabigu ku maammuli jiray kuna hagi jiray danta bulshadii ku hoos noolayd xukunkiisa.

Qiyamkaas oo uu qoraagu midkasta uga hadlay si faah faahsan aya waxaa ay yihiin sidaan soo socota :-

1. Karaamaynta Bini-aadamka

Fahanka Islaamku uu ka haysto nafta waa mid ku dhisan in qofku lahaan karo wanaag iyo xumaanba, taas oo ka dhigan in uusan jirin qof ma khaldame ah, si la mid ah uusan jirin qof sidiisa ba xumaan ama dhib u taagan.

Sidoo kale Islaamku waxa uu si xeeldheer isugu xiray shaqada qofka laga rabo in ay tahay mid adduuno iyo mid aakhiraba, oo ah adduunka inta uu joogana inuu wanaag ku dhaqmo aakhirana uu ku gaari karo cibaado suuban iyo camal wanaagsan, sida ku cad Qur'aanka Alle ¹ “قل أمر ربي بالقسط وأقسمو وجوهكم عند كل مسجد“

Sidoo kale insaanku inta aan lagaarin waxa uu rumaysan yahay, waxa uu Islaamkha caddeeyay in uu yahay qof sharfan kana sareeya dhamaan noolaha kale ee Eebbe dhulka ku beeray, sidoo kalana ay ka saran tahay masuuliyad weyn, uuna Alle wakiil uga yahay ilaalinta iyo ka talinta danta dhulkaan.

2. Burinta sanamyada siyaasadda

Islaamku waxa uu meesha kasaaray bilowgii horeba in hoggaanka ummaddu uusan lahayn waxyaalo u gaara sida in uu yahay Ilaaj ama uusan jirin xiriir cibaado oo kadhaxeeya hoggaanka iyo shacbakiisa.

NNKH isaga oo taas ummadiisa raba in uu baro waxa uu ahaa mid marka loogu yero boqor aad uga caroon jiray, bal waxa uu gaarsiiyay in ay tahay wax aan bannaanayn oo boqornimadu uu ilaahay kaliya leeyahay, Nabigu NNKH waatuu kulahaa ninkii u yimid oo cabsidu ka muuqatay isaga oo ka haybaysanaya islahana boqor ayaad lakulmaysaa “Ha

¹ Suuratul acraaf aayadda 29aad

cabsan anigu boqor ma ahiye, waxaan ahay oo kaliya wiil ay dhashay haweenay cunta hilibka“ taas oo Nabigu uu fahansiinayey ninka inuu yahay shakhsi bini-aadam ah oo caadi ah.

Fahanka saxaabada ay fahmeen qiyamkaas uu Nabigu ku abuuray naftooda ayaa waxa uu keenay in xilligii Cumar Bin Khadaab uu magaalada caasimadda u ahayd dawladda Islaamka uu yimid safiir uu soo diray boqorkii dawladii Roomanka, kolkaas na uu garan waayey hoggaamiyihii dawladda taas oo ku kalliftay in uu dadkii waydiiyo “War aaway boqorkiinnii?” kolkaas ayay saxaabadii ku dhaheen annagu boqor malihini ee waxaan leennahay hoggaamiye magaaladiisa gees kaga jira, ilaa uu markii dame safiirkii dul yimid Cumar oo hurda meel qoraxa dhagaxna barkin ka dhigtay dhididka kabaxayana uu qooyay dhulkii, markaas ayuu inta uu yaabay isaga oo is barbardhigay nidaamkii iyo dawladii uu kayimid iyo tan uu yimid hadda ayuu yiri “Alla kala dheeraa qaabka aad unooshahay iyo qaabka uu boqorkeennu u noolyahay”

Sheekadaas waxa ay natusinaysaa sida uu qiyamkaas uga dhaadhacsanaa dawladdii Islaamka ee majaraha u hayeen Khulufadii.

3. Dabarjaridda kala saraynta hoggaanka iyo bulshadiisa

Islaamku waxa uu yimid iyada oo hoggaamiyuhu yahay qof aan war lagu soo celin Karin, dalkana ku maammula hadba sida ay isaga ula muuqato. Nidaamkasta oo markaas jirayna uu ahaa nidaamkii fircooniga ah ee ka saraynta bulshada, waana midda aad ka dareemayso xikmadda ka dambaysa sida uu Qur’aanku in badan ugu soo celceliyo qisada Nabi Muuse iyo Fircoon, iyo qaabka uu ahaa nidaamkii xukun ee fircoon iyo dhibaataada uu kuhayay bulshadii ku hoos noolayd nidaamkaas.

Taas beddelkeeda, Islaamku waxa uu abuuray nidaam ay dadkiisu iyagu xaq u leeyihiin in ay doortaan, waxna iska waydiiyaan cidda maammulaysa oo ka talinaysa danahooda, isla markaasna uu ahaado mid ugu dhaqma sharciga si waafaqsan Qur’aanka iyo sunned, fahanka jiilkii saxaabdu na ahaa mid ku jaango’an arrintaas.

Sida laga dheehanayo, markii uu Cumar uu soo saaray go’aanka ah inuu xaddido Meherka haweenka, ayaa waxaa maalintii labaad arrintaas dood ka kenay kana soo horjeestay haweenay ka mdi ahayd shacbkii uu Cumar maammulayay go’aankaanna sida gaarka ah u saamaynayay, markii ay ladooday u sheegtay in go’aankaan uu Quiraanka iyo dastuurka kasoo horjeedo, ka dib na Cumar uu garwaaqsaday khaladkiisa uuna ka laabtay go’aankaas maadaama uu fahasanaa xaq dastuuriga ah ee shacabku leeyahay, ee ah in dood laga keeno wixii aan waafaqsanayn sharciga.

4. Isku haynta caddaaladda iyo wanaagga.

Islaamku uma imaan oo kaliya in uu dadka wanaagga faro kadibna iyagu ay ku xirnaato hadba sida ay u dhaqmayaan, balse waa nidaam siyaasi ah oo kulansaday, in dadka dhaqan ahaan loo dhiso isla markaasna laga shaqeeyo sidii ay caddaalad u heli lahaayeen, dadkuna aysan is dulmin, qofkasta na uu helo waxa uu xaq u leeyahay uuna guto wixii waajib ah ee lagu leeyahay taas ayaana ah CADDAAALAD. Si la mid ah Islaamku wuxuu dhiirrigeliyey qofkasta uu ku dadaalo in wixii lagu lahaa wax kabadan uu la yimaado, wixii isagu uu xaq u lahaana uu wax ka yar qaadan karo taas oo lagu tilmaami karo WANAAG.

Diinta uu Nabigu CSW waday waxa ay ahayd mid ka duwan diimihii hore oo iyagu yimid iyada oo ay jirtay nidaam dawladeed taas oo ka dhigaysay in ay xoogga saaraan akhlaada iyo dhaqanka oo laga dhiso ummadda, halka Nabi Maxamed CSW ay ahayd mid ku timid dhisidda nidaam dawladeed oo dhammeystiran awoodda saarana dhismaha akhlaaqeed iyo caddaaladeed ee bulshada. Iimaamkii Ibnu Taymiya marka uu sharraxayay aayadda “**ان الله يأمر بالعدل والاحسان**” waxa uu kusoo kooban inay tahay, isku keenidda awoodda iyo caddaaladda, diinta iyo dawladda.

5. Waajibnimada helitaanka nidaam dawladeed

Islaamku isaga oo ka jawaabaya mid ka mid ah weydiimaha aasaasiga ah ahna tan ugu muhiimsan waxa uu waajib ka dhigay in la helo nidaamd dawladeed, dadkuna ay waajib ku tahay in ay helaan cid ay hoggaansamaan, oo katalisa nidaamkooda hoggaamineed arrintaasina waa mid ay daliillada Qur’aanka iyo Sunnaduba si cad u qeexayso. Waxaana tusaale kuugu filan in Nabigu uu ummaddiisa ku waajibiyay haddii ay safar galayaan oo ay saddex qof yihiin, waa in ay doortaan hoggaamiye, marka haddii tirade intaa le’eg waajib looga dhigay maxaad mooddaa danta guud iyo bulsha weynta muslimiinta ah.

6. Xorriyadda

Waxaa laga suurtagal ah in ereyga ‘xorriyad’ aysan nusuusta Qur’aanka iyo Sunnada si cad ugu soo aruurin laakiin waxaa uu ahaa qiyam ay diinteennu asal uga dhigtay jiritaanka nidaamkasta oo dawladeed oo ay yeeshaan islaamku. Waxaa tusaale ku filansida uu Islaamku qofka usiiyay xorriyad, laga bilaabo in la karaameeyay qofnimdiisa, in awood loo siiyay ka talabixinta danta guud sida doorashada iyo cidda hoggaaminaysa, in awood loosiiyay in uu ka hor imaankaro doodna ka keeni karo go’aamada hoggaanku soo saran, haddii ay yihiin kuwa sharciga ka hor imanaya, in aan lagu khasbi karin qaadashada diinta iyo aragti uusan ku qanacsanayn

7. Caddaaladda nidaamka xukunka

Islaamku waxa uu asal uga dhigay nidaamkasta oo siyaasi ah in uu yahay mid ku dhisan caddaalad, xataa cadaaladaas maahan mid gaar u ah dadka u hoggaansan ama saaxiibka la ah nidaamkaas balse waa mid ay xaq uleeyihiin cadow iyo saaxiib ba. Alle SW waxa uu ujeedooyinka rusuusha loo soo diray ka dhigay sidii loo heli lahaa caddaalada. Caddaaladdaas iyo in uusan qofku cidna uga haybaysan sheegista xaqa waa mid lagu barbaariyay waajibna ku ah ummada Islaamka. Sida laga soo weriyey Cibaad bin Saamit “Nabiga ayaa asxaabtiisa kula dardaarmay in ay u istaagaan oo ku dhiirraadaan xaqa meelkasta oo ay joogaan, oo aysan Alle cidna uga cabsan“

Nidaamka caddaaladeed Islaamku waa mid kudhisan, waajibna ay tahay in qofkasta uu qof ka kale caddaalad u sameeyo, xilli kasta oo uu kusugan yahay, dulmiguna uu si kasta u reebban yahay aynan jirin si uu u bannaanaan koro”

Nabigu CSW waxa uu ku xiray in madaxda la addeeco, shardi ah in uu yahay qof caddaalad u saaxiib ah “

فعن سعد ابن تميم : (قلت لرسول الله صلى الله عليه وسلم ما للخليفة من بعدك؟ قال: مثل الذي لي إذا عدل في الحكم، وقسط في القسط، ورحم ذا الرحم فخفف، فمن فعل غير ذلك فليس مني ولست منه، يريد الطاعة في الطاعة، والمعصية في المعصية)

8. Sinnaanta iyo la dagaallanka kala sarraynta bulsho.

Islaamku waxa uu si qotodheer bulshadiisa ugu abuuray qiyam ku dhisan in ay dhammaantood Eebbe hortiis u siman yihiin uusan na jirin qof qof kale ka sharaf badan ama ka sarreeya. Nusuusta Qur’aanka iyo sunnada ayaa kuugu filan in ay bulshadu siman tahay. Waana tuu Nabigu NNKH laha, isagoo jeedinayey khudbaddii xajka sagootinta, doonayeyna inuu dhammaan dadkii goobtaas joogay hortooda ka qiro in nidaamka siyaasiga ah ee Islaamku uu aaminsanyahay in dadku ay simanyihiin hal meelna kawada yimaadeen. Sidoo kale na Islaamku uu caddeeyey inaan lagu kala sarrayn midab iyo jinsi, balse lagu kala sarreeyo cibaadada iyo sida loogu dhaqmo sharciga Alle.

9. Sinnaanta dhanka siyaasadda

Sinnaanta guud marka laga yimaado, sidoo kale waxa uu Nabigu NNKH uu si cad isla goobtaas ka caddeyay in marka lajoogo dhanka xuquuqda siyaasaddana ay bulshadu simantahay oo aysan jirin cid si gaara u leh xukunka. Waxa uuna bulshdii goob joogga ahayd ku yiri “*Maqla oo u hoggaansama haddii uu hoggaamiye idiin noqdo addoon madow oo tima adag oo xataa afarta adinba go’antahay*“. Dardaarankaas Nabiga waxa uu meesha ka saarayaa shuruudo badan oo fuqahadii gadaal katimid ay u dajiyeenk hoggaamiyaha muslimiinta, shuruudahaas oo ay ka mid yihiin: in hoggaamiyaha

Muslimiintu ahaado shakhsi xor ah, ku abtirsada Reer Quraysh ah. Shuruudahaani waa kuwa aan sal iyo raad ku lahayn nusuusta Qur’aanka iyo sunnada. Si la mid ah kuwaas aan soo xusnay, shardiga labnimada ma ahan mid nusuus diineed oo cad haysta. Sida laga dheehan karo xaddiiska kor ku xusan, addoonimadu waxa ay ahayd martabadaha bulsho tan ugu hoosaysa, Nabigu na waxa uu caddeeyay xataa addoon inuu ummadda muslimiinta hoggaamiyo haddii uu fulinayo sharciga Alle. Haddaba haweenka oo bulshada kaga jiray martabad sare maxaad moodda! Quraanka iyo Sunnaduba waxaad ka dheehan kartaa in **laba** shardi un lagu soo koobay qofka raba in hoggaanka muslimiinta qabto labadaas oo ah “**Awood**” oo loola jeedo qof ka bixi kara masuuliyadda, aqoonteeda iyo kartideeda na leh iyo “**Ammaano**” oo ah qof dhawrsoon, aaminsanna qiyamka iyo mabaadida uu booskaan u taagan yahay.²

10. Wadatashi

Wadatashi (Shuuro) ayuu Islaamku waxa uu asal uga dhigay hannaanka loo marayo dhistaanka nidaamkasta oo dawladeed oo raba in uu nasab sheegto islaamka.

Sooyaalka Islaamka inta la ogyahay saddex qaab ayay ku imaanayeen hoggaamiyaashii soo maray—Dhaxaltooyo, awood/maquunin iyo wadatashi. Labada dhabbe oo hore, awoodda iyo dhaxaltooyada waa kuwa aan sal iyo raad ku lahayn Islaamka, waana caadooyin ay ku dhaqmi jireen guud ahaan ummadihii wakhtigaas jiray. Hannaanka saddeexaad ee wadatashiga ayaa bud-dhig u ah Islaamka, waana wadiiqadii ay ku yimaadeen afartii khulufu.

Islaamku isaga oo ka jawaabaya mid kamida su’aalaha aasaasiga ah ee ah ‘Yaa xaq u leh xukunka?’ ayaa waxa uu u caddeeyay in qodfkasta oo muslim ah oo bulshadaas ka tirsan oo buuxiya shuruudaha awoodda iyo amaanada, bulshaduna ay raalli ka tahay uu xaq u lehay in uu ummadda hoggaamiyo, cidda uu doono haka soo jeedee.

Quraanku si cad ayuu u qeexay in waxkasta oo ay bulshadu wadaagto uu ku imaanayo wadatshi oo kaliya “**وأمرهم شورى بينهم**”. Waxaana daliil noogu filan sida uu Nabigu NNKH uu ugu dedaalay in uusan cid gaara uga tagin hoggaanka dhimashadiisa kadib. Marar badan oo la waydiiyay su’aashaas uu Nabigu tusay in ay tahay arrin iyaga utaal balse waxa uu ka talobixiyey aqoonta uu u leeyahay saddex qof, isagoo yiri “*haddii aad Abuubakar doorataan waxaad ka helayaan hoggaamiye ammaano leh, adduunka na aan jecalayn aakhirase aad ujecel. Haddii aad Cumar doorataan waa nin ammaano iyo awoodba leh xaqana Alle mooyee, aan cidna ugama haybaysto. Haddii aad Cali dooraana waxaad helayaa hoggaamiye hanuusan dadkana ku hanuuninaya*

² Qodobkaan qoraagu aad ayuu ugu dheeraaday hadii aad rabto in aad si buuxda xog uga hesho waxaan ku talin lahaa in buugga dib uigu noqoto gaar ahaan boogga 159-164

waddada toosanna“. Sida ku cad Xaddiiskaan, Nabigu cidna ma tilmaamin balse wuxuu sheegay sifooyinka hoggaamineed ee raggaas leeyihiin, tani waxa ay caddayn u tahay talada ay ku jirto bulshada gacanteeda, aysana jirin cid si gaar ah u dhaxasha oo looga dardaarmo.

11. Waajibnimada helitaanka matalaad bulsho

Maadaama ay adag tahay in bulshadu ay dhammaantood ka tala dhiibtaan dantooda, arrintaasi ay tahay waajib, ayaa Islaamku waxa uu jideeyay in laheloo koox dad ah oo bulshada inteeda kale matali kara (golaha Wakiillada). Waxaana arrintaas tusaale noogu filan, heshiskii labaad ee Caqaba, iyadoo uu Nabiga uu heshiis lagalay Ansaar laakiin heshiiskaas waxaa Ansaar wakiil uga 13 qof oo kala matalayay 13 qabiil ay ka koobnayd Ansaari, uuna madax u ahaa Ascad, sidaasna ayuu Nabiga NNKH iyo kooxdii lasocotay oo matalaysay Muhaajiriintii ku saxiixdeen heshiiskii gundhigga u ahaa dhisitaanka dawladnimadii Islaamka ee u horraysay, isla markaasna kooxdaasi ayaa si ammaano ku jirto waxa ay bulshadii ay matalayeen ugu sheegeen waxa ka dhalanaya heshiiska ay galeen, waxa ayna dhaheen *“Reer Yathribow ogaada heshiiskaan aan saxiixnay waxaa aad ku waayi doontaa dad badan oo odayaashiinna ah, seef badanna waa idin ku dhici doontaa, Carabna waad ku kala tagi doontaan laakiin Alle ayaad ajar ka helayaan. Haddii haddeer ba aynan arrintaas diyaar u ahayn oo aad ka baqaysaan ka jooga taas ayaana Alle hortii cududaar uga helayaane”*.

12. heshiisyada siyaasiga ah

Haddii uu Islaamku caddeeyay in talowadaag lagu imaanayo, sidoo kale na caddeeyay in muslimiintu ay cid matasha soo dirsan karaan, ayaa waxaa ka ratibmaya in muslimiintu ay aaminsanyihiin xiriirka ka dhexeeya iyaga iyo hoggaankooda, ayna tahay heshiis ay Alle hortiiis kula galeen in ay addeecaan hoggaamiyahooda. U hoggaansamiddaas iyo addeeciddaas waa mid ku xiran hadba sida uu hoggaamiyuhu u tixgalinayo sharciga lagu doortay ee lagula heshiiyey.

Heshiiskaasi waa mid ay muslimiintu u qoordhiibanayaan hoggaamiyahooda in uu ka taliyo danahooda, sidoo kalena si caddaalad kujirto u kala saaro wixii khilaaf ah ee dhexdooda ka dhasha, ama soo kala dhexgala iyaga iyo isla hoggaamiyahooda. Heshiiskaasi waa mid qeexaya in waxa ay ku heshiiyeen (sharciga) uu ka sarreeyo cidkasta.

Mabda’a saraynta sharciga, reer Galbeedku waqti badan ayey ku qaadatay in ay mabda’aas gaaran, halka uu Islaamku xilli hore qeexay, waana mabda’a ay hadda ku dhisantahay dimiquraadiyadda.

13. Ilaalinta midnimada ummadda

Bilowgiiba, Islaamku waxa uu ahaa mid ku dhisan diin kooxeed oo aan ahayn diin qof qof ah, sida aan horay usoo aragnayna waa midda ka dhigaysa waajib in la helo nidaam dawladeed iyo cid ay u qoordhiibtaan bulshada inteeda kale. Nusuusta Quraanka iyo tan sunnaduba si xeeldheer ayay uga hadleen muhiimada ay leedahay iyo waajibnimada ilaalinta midnimada ummadda ayna ahaato midnimadaasi mid ku dhisan sarraynta sharciga iyo caddaaladda.

14. U hoggaansamidda amarrada dawladda

Sidoo kale, waxa uu Islaamku dajiyay qiyam iyo mabaadi waajib ka dhigaysa in bulshadiisa in ay u hoggaansamaa oo ay fuliyaan amarrada kasoo baxaya dawladdooda—dawladaas oo ah mid kutimid sifada sharciga ah ee aan kor kusoo sheegnay. Addeeciddaas ayaa ah mid uu Qur’aanku isaga oo laba aayadood oo isku xiga uu kula hadlay masuuliyiinta iyo shacbkaba, mid walba u sheegay waajibaadka saaran. Aayadaha 58 iyo 59 ee Suuradda ‘Nisaa’ ayaa macnahoodu noqonayaa sidatan *“Eebe wuxuu idin farayaa inaad u guddaan (siisaan) Ammaanada ehelkeeda, haddii aad kala xukumaysaan dadkana inaad ku kala xukuntaan Caddaalad,”* *”Kuwa xaqa rumeeyow u hoggaansama Eebe iyo rasuulkiisa iyo kuwa idin hoggaamiya ee idinka mid ah”*

Si la mid ah, madaxda laguma addeecayo go’aamada aan waafaqsanayn sharciga Alle iyo heshiisyada bulsho. Waana tuu Nabigu NNKH lahaa *“addoon lagu addeeci maayo, hadday ka ratibmayso in Alle lagu caasiyo”*, yacni amarkasta oo sharciga ka soo horjeeda madaxda laga maqli maayo.

15. Ka hortagga raadinta xukunka

Iskaamku waxa uu si guud u boorriyey in xukunka aan lagu ordin, aysanna sahlanaayn ka bixitaanka masuuliyaddaas weyn. Nabiguna isaga oo taas kaduulaya waxa uu dad badan oo waydiistay in uu xil u magacaabo uu u sheegay in aysan ka bixi karin masuuliyaddaas, sidoo kale na aysan dadka xukun doonka ah aan wax loo magacaabin, balse bulshadu ay doortaan markasta cidda ka bixi karta booskaas.

Nabigu CSW wuxuu uu ka diiday inuu jago u magacaabo asxaav waaweyn, oo uu ka mid Abuu Dar Alqafaari, isagoo u sheegay in masuuliyaddu ay tahay ammaano, oo uusan ka bixi Karin—tani kama dhigna in la duray shakhsiyadda saxaabigaas.

Iyada oo mabda’aas guud jiro, haddana taas macanheedu ma ahan in markasta raadinta xukunku tahay mid reebban balse aasaasku sidaas yahay. Sida ku cad qisadii Nabi Yuusuf ee Qur’aanku ka sheekeyey, waxaan ka dheehan karnaa in uu Nabi Yuusuf raadiyay xukunka, isaga oo aaminsanaa in uu yahay qof ka kaliya ee ka bixi kara booskaas. Waa

sababta ay culimadu u daliishadaan in raadinta xukunku aslan aysan bannaanyn balse uu raadin karo, haddii qofku u arko in booskaas aysan jirin cid isaga kaga habboon. Xaaladaha qaybtood waajib ayay ku noqnaysa qofka in uu booskaas raadiyo hadduu arko in hoggaankii u gacan-galay dad aan ehelkeeda ahayn.

16. Ka hortagga dulmiga iyo fasaadka

Qur'aanku in badan ayuu iftiimiyey, dagaalka soo jireenka ah ee u dhaxeeya caddaaladda iyo dulmiga, wanaagga iyo fasahaadka, waana sabata uu Islaamku u amray jihaadka sida kucad labadii aayadood ee ugu horraysay oo jihaadka muslimiinta lagu amrayey, iyada oo Islaamku kusoo aruuriyay sababha jihaad loo gali karo sidatan:

- *Difaacista xaq iyo nafta, sida ku cad Suuradda Xaj “Waxaa loo idmay kuwa lala Dagaallamayo (inay Dagaalamaan), maxaa yeelay waa la dulmiyey, Eebbe na gargaarkooda wuu awoodaa. (39) waana kuwa xaq darro looga saaray guryahoodii iyo inay dheheen Eebbaheen waa Alle,...40 “*
- *U gargaaridda dadka tabarta daran ee la dulmiyo sida ku cad Suuradda Al-Nisaa “Maxaad leedihiin oo aad ugu dagaallami waydeen Jidka Eebe, iyagoo kuwa tabarta yar oo rag, haween iyo carruur ba ay leeyihiin Eebbow naga bixi magaaladan dulmiga ah, Ehelkeedu noogana yeel agtaada weli iyo gargaare”*

Qiyamka lagu hawlgalinayo nidaamka siyaasiga ah ee Islaamka

Waxaan kor ku soo sheegnay qaybta 1aad ee mabaadi'da ay waajibka tahay in aasaas looga dhigo nidaam kasta oo siyaasi ah oo ay dad Muslimiin ah rabaan in ay dhistaan. Mabaadi'daas 16 ka ahaydwaxa ay bud-dhig u yihiin shaqada dhismaha dawladnimada Islaamka.

Haddaba, dowladdu waxa ay u baahan tahay qiyam kale oo lagu hawlgaliyo maadaama falasafadda dhistaanka iyo tan hawl galintu ay kala duwan yihiin, in wax ladhiso waxaa kasii muhiimsan in la joogteeyo wixii noo dhisnaa, dawladnimada waxaa ka dhasha kulanka laba kooxood; koox maammulka leh oo shaqadeedu tahay katalinta danta guud iyo koox kale oo ah bulshadii dantooda laga talinayay. Hadaba labadaas kooxood oo aan soo sheegnay mabadi'da iyo qiyamkii lagu dhisay, maxay tahay qiyamka adkaynaya wada jooggooda iyo wada shaqayntooda.

Qaybtaan waxa uu qoraagu si ka duwan sidii ay fuqahadii iyo mufakiriinta Islaamku uga hadleen mowduucaan uga hadlayaa waxa uuna noo soo bandhigay qiyam ay waajib tahay in dawladnimada Islaamka ee jirta in ay ka dhigato sharci ay kula dhaqanto cidda iyada bannaanka ka ah, cidda ay iyadu maamusho iyo iyada laftigeedaba.

Qoraagu waxa uu ku soo koobay qaybtaan 14 qiyam oo qayb tood ay isa soo galayaan kuwii hore laakiin ay qaabka looga shaqaysiinayo marka lajoogo dawladnimada Islaamka ee dhisan ay ka duwan tahay marka lagu jiro marxaladda laraadinayo dhisidda dawladnimada Islaamka, hadaba aanu mid walba isku dayno in aan si kooban ugu soo qorno halkaan annaga oo isku dayayna in aanan ka tagin nuxurkii buugga maadaama aanan soo wada qori karin.

1. Ilaahay iyo rasuulkiisa oo lagu kala baxo

Ilaahay sida uu Qur'aanka ku sheegay waxa uu markii uu sheegay waajibaadka lagu leeyahay hogaamiyaha ummadda iyo waajibaadka lagu leeyahay shacabkaba uu hadana isla aayadaas ku qeexay mabda' weyn oo meesha ka saaray in xaakimku yahay macsuum aan khaldami karin doodna laga keeni karin hadalkiisa. Waxa uu Ilaahay aayadaas addoomihiisa u caddeeyay in hoggaamiyaha iyo shacabkiisuba ay siman yihiin cidda kaliya ee saraynta leh uu yahay sharciga, dood kasta iyo muran kastaba oo dhexdooda yimaada ay ku kalabaxayaan sharciga oo lagu soo koobay Qur'aanka iyo sunada Nabiga (NNKH). Alle ayaa aayadahaan si cad ugu sharraxay arrintaas aayadaha 58aad iyo 59aad ee suuradda Al-nissa ayaa macnahoodu noqonayaa sidaan *“Eebe wuxuu idin fari inaad u guddaan (siisaan) Ammaanada Ehelkeeda, haddaad kala xukumaysaan dadkana inaad ku kala xukuntaan caddaalad,” “Kuwa (Xaqa) rumeeyow addeeca Eebbe oo addeeca Rasuulka*

iyo kuwa madaxda u ah, oo idinka mid ah, haddaad ku dooddaan arrin u celiya Eebbe iyo Rasuulka “.

Mabda'aas waxa uu natusinayaa in hoggaamiyaha iyo shacabkuba ay sharciga usiman yihiin meesha kaliya ee si siman ugu kala bixikaraanna ay tahay sharciga, sidoo kale waxa uu natusinayaa in hoggaamiyuhu uusan waxaan sharciga ahayn dadka ku xukumi Karin.

2. Ilaalinta doonista buslahada

Diintaan waxaa hoggaan u ahaa Nabi Muxammed (NNKH) oo Ilaahay ka dhawray in uu khaldamo markii uu dhintayna waxaa lagu wareejiyay ummadda Muslimiinta ah oo iyana ah kuwo ka dhawrsan khalad oo aysan suuragal ahayn in ay dhamaantood isku raacaan wax khalad ah. Mabda'aas ayaa doonista buslahada Muslimka ah ka dhigaya mid waajib ah oo ay tahay in la tix galiyo, meesha diimaha kale ay jiraan dad ka nasahan khaladka diinta Islaamku waxa ay booskaas galisay Muslimiinta oo dhan oo uu Ilaahay sheegay in aysan khalad isku raaci karin, waxaana kow ka ah arrintaas in la tixgaliyo maammulka ay si wadajir ah udhiseen.

3. In la iska qabto dulmi wadaha

Nidaamka Islaamiga ah waxa uu bulshadiisa farayaa in ay waajib ku tahay in ay iska horleexiyaan qof kasta oo dulmi wade ah oo raba in uu qaato wax uusan xaq ulahayn. Arrintaas waxa ay marka koowaad waajib ku tahay hoggaanka Muslimiinta si taas lamid ah haddii uu isagu noqdo mid dulmi wade ah kuna takrifal awooddeeda ayaa waxaa bulshadaas waajib looga dhigay in ay iska hor leexiyaan.

Nabigu waxa uu isaga oo taas dareensiinaya ummadiisa uu noo sheegay in shahiid ama naftii hore ka wanaagsan oo kafadli badan uusan jin qof naftiisa ku waayay isaga oo ka horyimid dulmiga uu wado hoggaamiyaha, hortiisana ka sheegay xaqa dabadeedna sidaas kuwaayay naftiisa, xataa waxa uu ka fadli badan yahay qof isaga oo gaalo kusoo duushay Musliimta ka difaacaya ku dhinta.

4. Hantida guud waa mid Ilaahay leeyahay

Diinta Islaamku waxa ay si cad u kala saartay hantida dadka ka dhaxaysa iyo tan gaarka loo leeyahay waxa ayna hoggaanka Muslimiinta loo caddeeyay sida ay ku bixin karaan hantida guud ee ummadda kawada dhaxaysa, sidoo kale waxaa ciqaab adag la saaray qof kasta oo ku takrifala hantida guud, waxaana lagu soo koobay in lagu bixiyo danguud oo

lawada arkayo iyo in gunno yar laga siiyo qofka u ban baxay ka shaqaynta danta guud sida shaqaalaha dawladda , ama in lagu kaalmeeyo qof Muslimiinta kamid ah oo baahan.

5. Ka hortagga laaluushka

Iyada oo qodobkii hore laga duulayo waxaa gabi ahaanba la xaaraantimeeyay in hantida ummadda oo lagu takrifalo, dano gaar ah loo adeegsado. Ilaahay isaga oo arintaas caddaynaya waxa uu yiri “*Kama suurowdo Nabi inuu wax Khayaamo, Ruuxii wax Khayaama wuu la Imaan wuxuu khayaamay maalinta miyaame, markaas waxaa loo oofin (Dhammayn) nafkasta waxay kasbatay lagamana dulmiyo.* (161) al cimraan “

Sidoo kale aayadaan ayaa iyana si cad u qeexaysa in hantida dadka aan la cuni Karin “*hana ku cunina xoolihiinna dhexdiinna si baadil ah (Xaq darro ah) idinkoo u dhiibi (Laaluush) xaakimiinta si aad ugu cuntaan qayb ka mid ah xoolaha dadka dambi idinkoo og.* (188) al baqra “

Nabiguna iskadaa in uu qofku xoola dadwayne cunee waxa uu shaqaalaha dowladdiisa ka mamnuucay in aysan sina ku kasban hanti iyaga oo adeegsanaya booskooda, xataa haddii ay tahay hadiyad. Nabiga ayaa waxa uu Ibnu Atabiya u xilsaaray in uu sakada soo aruursho. Markii uu shaqadii soo qabtay ayuu yiri, “intaanna waa sakadii, intaanna waa hadiyad si gaar ah la iisiiyay” markaas ayaa Nabigu ku yiri, haddii ay dhabtahay haddiyaaddaas maad joogto gurigiinna bal in hadyad lagu keeno! Markaas ayuu Nabigu ummadda oo dhan la hadlaya yiri “*Wallaahay inuusan midkiin qaadanayn wax uusan xaq u lahayn, hadduu sidaas sameeyana maalinta qiyaamaha lasoo taagayo*”

Qisadaas waxa uu Nabigu nagu barayaa in Diinta Islaamku ay mamnuuc ka tahay waxkasta oo fududayn kara in shaqaalaha dowladdu cunaan ama ku helaan hantida dadweynaha.

6. Ammaanada

Iyada oo laga jawaabay weydiinta ah xilka/mansab hogaamiyaha ummadda uu u hayo ma mid rabbaaniyaa (hibo Alle) mise waa si kale, ayaa Islaamku waxa uu qeexay in ay tahay ammaano ay ummaddu ku ammaanysteen in uu danahooda guud kataliyo, haddii uu gudan waayana uusan kulahayn bulshada wax tixgelin iyo addeecid, Waxaana taas daliil u noqonaya Aayadahii 58^{aad} iyo 59^{aad} ee Suuradda Al-nia ee aan kor kusoo xusnay.

7. Awood iyo hawl karnimo

Nidaamka siyaasiga ah ee Islaamku waxa uu marwalba aaminsanyahay in ummadda hoggaankeeda loo dhiibo qofka ka bixi kara shaqada, lehna awooddeedii, kartideedii iyo hadba shuruudaha ay shaqadaas rabto sida aqoonta ama xirfadda.

8. Ku habboonaanshaha qofka iyo jagada siyaasiga ah

Iyada oo markasta sida aan kor kusoo sheegnay ay waajib tahay in la soo hormariyo awoodda iyo hawl-karnimada uu uleeyahay qofka shaqada loo dirayo, ayaa haddana nidaamka siyaasiga ah ee Islaamku meesha ka saarayn in la tixgeliyo waxyaalaha kale ee soo kordhaya sida dhaqanka bulshada, dabeecadda dhulka iyo ilaalinta dareenka bulshada la rabo in shaqada loo qabto. Waxaa tusaale noogu filan in Nabigu uu qabiillo markaas soo Islaamay uu madax uga dhigi jiray odayaashooda iyaga oo la helayo dad kaga habboon booskaas dhan diineed, aqooneed iyo hawl-karnimaba balse uu door bidayay in uu ilaaliyo dareenkooda. Si taas lamid ah waxaa sameeyay Cumar bin Khadaab kolka uu xilka ka qaaday Sacad bin Abii Waqaas oo kamid ahaa tobonkii saxaabi ee Jannada loogu bishaareeyay, kartidiisana uu Cumar aaminsanaa inuu u qalmay khaliifka Muslimiinya, haddana waxa uu tixgeliyey cabasho ka timid reer Kuufa

9. In laga wadatashado go'aan qaadashad.

Haddii aan niri hoggaamiyaha Muslimiinta waxa uu ku imaanayaa talowadaag iyo raalli ahaanshaha bulshada, si la mid ah Islaamku waxa uu ku waajibiyay hoggaamiyaha Muslimiinta go'aan kasta oo uu qaadanayo in uu dadka ay khusayso talo ka weydiyo, bulsha weyntana ka talogaliyo si ay qayb uga noqdaan samaynta go'aanka. Alle na isaga oo arrintaas muhiimaddeeda natusinaya ayaa waxa uu Nabigiisa ku amray in uu ummadiisa latashado “*kala tasho amarka, markaas haddaad wax goosatana talo saaro Eebe, Eebe wuxuu Jecelyahay kuwa talo saartee*” (159) Al-cimraan. Haddii Nabi Muxammed oo khalad kasta ka nasahnaa lagu amray in inta uusan go'aan gaarin ummadda latashado kadibna go'aansado, Allen na talo saarto maxaad mooddaa dadka kale!

10. Talo siinta hoggaamiyaha

Sida loogu amray hoggaamiyaha in uu bulshadiisa latashado, ayaa sidoo kale waxaa masuuliyad lasaaray bulshada in ay markasta lataliyaan hoggaankooda una sheegaan waxa uu ku khaldan yahay, iyaga oo u maraya hab asluubaysan oo ay ku dheehantahay wax sixid. Nabiguna waxa uu ummadiisa kula dardaaramay “*waxaad yeelan doontaan madax ee haku kaalmaynina dulmigooda*” sidoo kale waxa uu yiri “Haddii uu Ilaahay qof madax ah khayr ladoono waxa uu wasiir/la taliye uga dhigaa mid run badan oo hadii uu wanaagga illoobana xasuusiya hadduu xasuustana ku kaalmeeya...”

11. U turidda bulshada

Qofka hogaamiyaha ah waxa uu nidaamka siyaasiga ah ee Islaamku ku waajibiyay in uu u turo kana shaqeeyo danta bulshada uu Ilaahay hortiis mas'uuliyadda u qaaday, uuna marwalba ka shaqeeyo waxa ay iyaga dantu ugu jirto. Nabigu markii uu la dardaarmayay

labo hoggaamiye oo uu u diray Yaman waxa uu kuyiri “*Dadka u fududeeya oo haku culsaynina ...*” sidoo kale waxa uu yiri Nabigu “*Ilaahow qofkii ummadayda madax unoqda oo dhiba isna dhib, kii wanaajiyaan wanaaji*”

12. In aysan madaxdu iska qarin bulshadeeda

Islaamku waxa uu hogaanka bulshada ku waajibiyay in aysan ka dhex bixin bulshada ay maamulayaan oo ay markasta u fududeeyaan qofkii raba in uu madaxda la kulmo, waayo dhammaan waajibaadka aan soo sheegnay ma suuragalayaan haddii aan ba la arki karin hoggaamiyihii, latalinta iwm. Nabiga waxaa laga wariyay in uu yiri “*qofkii madax u noqda Muslimiinta oo isaga oo aan dantooda u qaban iska qariya Ilaahay ayaa isna dantiisa ka qariya oo aan u fulin*”

13. In aan qofka lagu khasbin diin gaar ah

Diinta Islaamku waxa ay u timid in ay abuurto Insaan xor ah oo xor ka ah addoonsiga Insaanka kale, xor ka ah in uu caabudo sanamyo, taas mid lamid ah waxa uu Islaamku abuuray mabda’ uusan xataa diinta xaq ah ee uu wado aan ku khasbayn qofka. Sooyaalka Nabiga, lagama helayo meel lagu sheegay in uu Nabigu dad si khasab ah ku yiri diinta bal Qur’aanka iyo risaaladii Nabigu waxa ay dadka ku boorrinayeen in ay si dhab ah oo ku qancid dhammaystiran ah Ilaahay u rumeeyaan oo aysan kujirin munaafaqad. Qur’aankuna marka uu ka hadlayay xoriyadda diiniga ah waxa uu Ilaahay yiri “*لَا إِكْرَاهَ فِي الدِّينِ*” oo macnaceedu yahay “Sandulle ma ahna Diinta galiddeedu”

Laakiin se doodda ah haddii uu qofku Islaamo kama noqon karo Diinta Islaam, waa dood fuqahadu ay aad uga doodeen, waxaana uu qoraagu iyo aniga oo ku raacsan noola muuqataa in sida saxda ah ay tahay in la kala saaro, oo ay tahay labo ammurood. Waa midda koowaade, waa qofka murtadka ah ee dagaal yahanka ah una qalab qaatay sidii uu ula dagaalami lahaa midnimada ummadda iyo la shaqaynta cadowga. Qofkaas xukunkiisu waa dil, waana mid dhammaan shuruucda aduunka oo dhan la isku waafqsan yahay waana waxa looyaqaan “khiyaano qaran”. Ammuurta labaad ayaa ah qof diinta ka baxay aysanna jirin wax dhib iyo hagardaamo ah uu u gaysanayo diinta iyo ummadda ba, haddaba majirto wax xikmad ah oo ka dambaysa in la dilo qofkaas! Waayo dilka dadka diinta ka baxay balse aan dhib ku hayn diinta iyo ummaddeeda waxa ay sababi kartaa in qof qalbiga ka gaal ah uu afka ka sheegto Islaamnimo isaga oo naftiisa u baqaya in la dilo, taas oo ka dhigan in heerka munaafaqnimadu kororto, dhalinna karta in maalinta ay jaanis helaan ama cabsidaas meesha kabaxdo umada ka aargoosta waana arinta uu Nabigu marwalba ka digi jiray oo ah ladagaalanka fikirka munaafqnimada. Aayadda aan kor kusoo xusnay ayaana si cad u qeexaysa in aanan qofna lagu khasbi Karin geliida Diinta Islaamka.

Inkastoo Xadiiska ah “*qofkii badala diintiisa dila*” ay sixitaankiisu dood kajirto, haddana waxaa xaddiiskaas gaar yeelay xaddiis kale oo caddeeyay nooca murtadka ladilayo. xadiiksaas oo ah “التارك لدينه المفارق للجماعة” oo micnahiisu yahay “*kan diinta ka taga oo ka shaqeeya burburinta midnimada umadda*” oo loola jeedo murtadka dagaal oogaha ah. Waxaa sidoo kale soo aroortay in Nabigu uusan dilin dad badan oo diinta kabaxay xiligiisii, ayna ugu horeeyeen munaafiqiinta magaalada Madiina oo Nabigu ogaa in ay afka ka sheeganayeen Islaamnimada saas oo ay tahay waxa uu dhihi jiray Nabigu “*la dhihi maayo Nabi Muxammed ayaa asxaabtiisa dila*” sidoo kale Cabdalah bin Jaxash markii uu diinta kabaxy nabigu cid disha uma dirin.³

Qur’aanku waxa uu mabda’ ahaan jideeyay xorriyad qofka loo siiyay inuu mu’min noqdo ama uu gaal noqdo, abalgudka arrintaasina ay tahay mid aakhiro la isla tagayo, oo kii Ilaah rumeeyana janno mutaysan doono kii Ilaahay aan rumaynna naar mutaysan doono, laakiin se adduunka aysan jirin xukun ay dawladda Islaamku ku oofinayso qofka aan diinta qaadan. Waana tan uu Ilaahay leeyahay “*waxaad dhahdaa xaqu Eebihiin buu ka ahaaday ee ciddii doonta ha rumayso ciddii doontana ha gaalowdo*”, 29 suuradda Alkahfi

14. Ilaalinta midnimada ummadda

Dhammaan hadafka uu u taagan yahay nidaamka siyaasiga ah ee Islaamku ayaa ah ilaalinta midnimada ummada waana sababta kaliya ee ka dhigaysa waajib in la helo nidaam siyaasi ah oo ilaaliya jiritaanka bulshada, Qur’aanka iyo sunadaba aayadod iyo axaadiis fara badan ayaa kusoo aroortay waajibnimada in la ilaalisho midnimada ummadda, waana sababta loo waajib yeelay jihaadka , iyo in Muslimiintu ay hantidooda ku baxshaan ilaalinta midnimada.

³ Waa arin dood badan ka taagan tahay aanna halkaan lagu soo koobi Karin.

Qaybta 2aad : culaysyadii ay ka tageen dawladihii islaamka soo maray.

Waa hubaal in ay maskaxdaada ka guuxayso haddii uu Islaamku leeyahay qiyamkaas kor ku xusan maxaa kallifay in dawladihii soo maray islaamku ay ahaayeen kuwo ku dhisan nidaam keli-talinimo, xukunkana ay qoys gaar ah sidii hanti ay leeyihiin isaga dhaxli jireen ?.

Qaybtaan waxa uu qoraagu si faah faahsan uga hadlay sooyaalka siyaasadeed iyo qaab-dhismeedkii dawladihii islaamka maamulayay laga bilaabo Dawladdii Umawiyyiinta ee uu Asaasay Saxaabigii Mucaawiya ilaa dawladdii ugu dambaysay ee Cismaaniyada.

waxa uu qoraagu si mug-wayn qaybtaan uu kusoo koobaya sida ay umaddu uga leexatay qiyamkaas uu Nabi Muxamed ku barbaariyay jiilkii 1 aad ee dawladnimada islaamka.

Qaybtaan oo uu qoraagu u qaybshay laba fasal ayuu waxa uu fasalka 1 aad kusoo gudbinayaa daba-gal uu ku samaynayay qaabkii ay ku burburtay Dawladdii **KHULAFAA'U RAASHIDIIN** ee ahayd mid ku dhisan qiyamka iyo mabaadi'dii ay ka dhaxleen Dawladdii Nabiga iyo qaabka ay ku bilaabatay yagleelidda dawladii taas ku xigtay.

fasalka labaad na waxa uu ku soo ban-dhigayaa sida ay muslimiintu ay meesha uga saareen qiyamkii siyaasiga ahaa ee uu islaamku la yimid taas badalkeedna ay aad ugu saamoobeen nidaam siyaasadeedkii dawladdii Beershiyaanka gaar ahaan waxa uu qoraagu cilmi-baaristiisaan ku caddaynayaa in Tix-raaca 1aad ee qaab siyaasadeedkii dawladdaas dambe uu badankiis ahaa talooyinkii iyo falsafadii uu ku xukumi jiray boqorkii Ardashiir kii 1aad oo ahaa aasaasihii dawladdii Saasaaniyada oo ku dhawaad afar qarni katalinaysay dhulkii Beershiya ilaa ay soo gaartay furshadii islaamka.

Hadaba waxaan dhihi garna waxaa qaybw ayn ka ahaa in Qiyamkaas uusan noqon kid hirgala qodobadaan soo socda:-

1. Gaabkii ka dhashay hareeraha dawladihii xoogga lahaa

Sida aan ognahay soo saaritaanka nabiga NNKH ka hor waxaa aduunka ka jiray laba dawladdood oo awood lahaa kuwaas oo kala ahaa dawladii Roomanka oo ahayd dawlad haysata diinta Kiristanka iyo dawladdii Beershiya oo ahayd dawlad diin wathani ah oo dab caabuda haysatay.

Jaziiradda Carbeed oo labadaa dawladdoodba deris la ahayd sidoo kalana kala dhexeeyay xiriir ganacsi iyo mid bulshaba, ayaa haddana waxaa ay ahayd mid aysan labada dawladdoodba saamayn maamul ku lahayn, waxa ayna ahayd jaziiraddu mid uusan ka jirin maamul dawladeed oo kala saaraya awoodaha, taas badalkeed ay ka jirtay awwod bulsho

oo ku dhisan tix-gelin iyo heshiisyo ka dhaxeeyay qabiiladii ku noolaa jaziiraddaas carbeed iyada oo ay reer walba lahaayeen oday dhaqameed reerkiisu tix-geliyaan balse aan ku lahayn awood dawladeed.

Arimahaas ayaa waxaa ka dhashay qodobadaan soo socda

A. Mabaadi'da iyo Deegaan ku haboon

Arrintaas aan kor soo sheegnay waxa ay ahayd mid marka dhan laga eego fursad u ahayd nidaamkii bilowga ahaa ee uu islaamku la yimid taas oo u sahashay in uu ku barbaaro deegaan aysan ka jirin nidaamyo siyaasadeed oo kale oo dagaal kula jirta.

labadaas arrimood ee ka jiray jasiiradda carbeed oo kala ahaa deegaanka dihin iyo dawladihii ku hareeraysnaa waxaa ka dhashay laba arimood oo is-diidan.

Tan koowaad oo ah deegaanka dihinna waxa uu islaamku helay deegaan uu si dhibyar ugu faafo oo uu bulshadii joogtay xilli yar ay halmar ku qancaan nidaamkii cusbaa oo ahaa nidaam Rabbaaniya ilaahyna ugu talagalay in uu aadanuha ku bad baadsho laakiin si lamida taas deegaankaas dihini waxa uu keenay in bulshadii carbeed ay isla markiiba ka boodeen qayb badan oo laf dhabar u ahayd qiyamkii iyo mabaadi'dii ay ku dhisnayd dawladdii uu nabigu ka dhisay jasiiradda carbeed

Tan Ibaadse oo ah dawladihii ku hareeraysnaa jasiiradda carbeed waxa ay u sahashay in ay dhaxlaan dawlado kaabayaasheedu udhisan yahay oo ay si sahlan dawlanimada islaamku ku gaaratay min bari ilaa galbeed, laakiin si lamid ah taas ayaa waxaa ka dhashay in nidaamkii ka jiray dawladihii ay dhaxleen kaabayaashooda dawladnimo ay si sibiig ah ugu dhex milmeen nidaamkii islaamiga ahaa ilaa markii dambe ay inta badan qiyamkii lagu dhisayay dawladnimada islaamka uu meesha ka baxo, laguna beddelo kuwii ka jiray dawladihii uu islaamku ladagaalamay.

farqiga u dhaxeeyay dawladii Beershiyaanka iyo dawladihii kale uu ahaa diinta labada dawladood oo kaliya, laakiin nidaamka xukunka uu ahaa mid isku mid ah oo ku dhisnaa nidaam keli-talis ahaa kana fogaa nidaamkii islaamiga ahaa ee ku dhsianaa tala wadaagga.

B. Is-bahaysigii jaantaa-rogonta iyo tadhahaada “ qooqa”

foodadii iyo dawlad la'aantii horay uga jirtay jaziirada carbeed iyo qooqii iyo dulmigii dawladihii waawaynaa ee iyada ku hareeraysnaa, ayaa keenay in uu bara-bixiyo oo uu aad u ciriiriyo nidaamkii siyaasiga islaamiga ahaa oo awalba markaas ahaa mid bilow ah oo kobcayay.

Meesha uu nidaamka islaamku ku dhisnaa laba is-bahaysi oo ah xorriyadda iyo nidaamka taas oo xoriyadu ay qofka u damaanad qaadayso bani aadanimadiisa oo uu yahay qof xor ah ilaahay ku xiran dawlada Meesha ka jirtana uu qayb xorriyadiisa ah uga tanaasulay si ay uga shaqayso dantiisa iyo tan guud ba, Meesha nidaamkuna uu u taagan yahay sidii loo hir gelinlahaa danta guud ee kawada dhaxaysa bulshada loona ilaalin lahaa karaamada iyo bani aadanimada qofka, waana waxa looyaqaan “ heshiis bulsho “ si kale haddaan u dhigo dadku iyaga ayaa dawladda samaysta si ay u helaan cid dantooda kashaqaysa ee dawladdu kuma timaaddo in ay dadka maamusho si ay iyaga ugu shaqeeyaan.

Waa tuu lahaa aabaha dastuurka maraykanka jeemis maadiisoon “ waa in dawladdnimada loo sahlaa si ay xakamayso dadka marka laad kadibna ay iyadu is xakamayso “ hadalkiisa ayaa kusoo aruuraya in dadka iyo dawladduba ay kuwada dhaqmaan sharciga oo aysan qolona qolada kale ku xadgudbin.

C. Amarkoodu waxa uu ahaa foowdo.

Nidaamka uu islaamku layimid oo ahaa “ talo-wadaag “ ayaa waxa uu ahaa mid ku cusub dhaqankii carbeed ee ku dhisnaa “ nin walbow naftaa “ taasina waxa ay kamid ahayd waxyaabihii soo dadejiyey in uu daciifo oo laga xoog bato nidaamkii siyaasiga ahaa ee islaamka, waayo carabtu waxa ay ahaayeen kuwo ku faana in uusan qofku cidna uga haybaysan dantiisa.

D. Boqortooyinkii madhalayska ahaa.

Waxyaabaha caqabadda ku noqday nidaamkaas waxaa kamid ahaa iyada oo ay jireen isku dayo badan oo fashilmay kahor islaamka kuwaas oo ahaa in ay odayaal dhaqameedyo badan oo xiriir fiican la lahaa dawladihii awoodda lahaa ee jiray isku dayeen in ay sameeyaan boqortooyin u eg kuwa ay soo arkeen taasina waxa ay keentay in dadku ay markasta aaminsanaayeen in aysan carabi dawlad noqon Karin haduu nabigii dhintay, si lamid ah taasina dad badan oo madax ahaa ayaa aaminsanaa in sida keliya ooy ku imaan karto dawladdnimadu ay tahay awood iyo maqunin “ waana meesha ay soomaalidu ka aaminsan tahay in soomaali uu maamuli karo oo kaliya ninkii dila “.

E. Islaamka iyo shakhsiyada carbeed.

Shakhsiyada carbeed ayaa ahayd mid diinta aad u tix-gelisa kana dambaysa laakiin diintaas oo ahayd mid keliya dhan duquusaadka aan dhaafsiisanayn, nidaamka islaamkuna waxa uu ahaa nidaam shaamil ah oo dhammaan qaybaha nolosha oo dhan kulansanaya arintaas ayaa waxa ay ahayd mid ku adkayd dhaqankii carbeed ee foodada u bartay, kuna dhisnaa qabiilka, islaamku waxa uu aad ugu dedaalay in uu ladagaalamo nidaamkaas laakiin waxaa

markasta jirtay qayb bulshadii islaamka kamid ahayd oo nin jeclaysiga iyo is xigsiga qabiilku qalbigooda kujiray, taas oo sababtay in dawladnimadii islaamku iyada oo aan qarni barkiis gaarin ay meeshaas ku burburto ilaa heer aan maanta bulshada muslimiintu marka ay maqlaan dawladnimda islaamka ay qalbigooda kusoo dhacayso kuwa aan sal iyo raad toona ku lahayn nidaamkii islaamka, sida reer Galbeedku ay u aaminsanaayeen in aysan suuragal ahayn in la helo dawladihii ku dhisnaa maamul-wanaagga ee kajiray magaalooyinkii Athina iyo Roomaa ayaa muslimiintu waxa ay latahay mid aan suuragal ahayn in la helo dawladnimo ku dhisan mabaadi'dii iyo qiyamkii ay ku dhisnayd dawladnimadii islaamka.

F. Hadaba aan soo koobno heerarkii ay martay burburkii dawladnimadii islaamku

1. Saamayn ilaa kacaan.

Bilowga ka leexashada wadadii saxda ahayd waxa ay ahayd bartamihii xukunkii khaliifkii Cismaan. isagu waddo sax ah ayuu ku yimid xukunka bal labadii ka horaysay waxa uu kaga sii fiicnaa doorashadiisa waxaa ka qayb qaatay inta badan muslimiinta laakiin qoyskii cusmaan ayaa waxa ay ka faaidaysteen qalbi wanaagii khaliifka, taas oo keentay in uu khalkhal ku yimaado qiyamkii lagu hawlgalinayay dawladnimada islaamka taasina ay markii dambe keentay in ay burburto qiyamkii laguba asaasay.

Waxa ayna cabashooyin fara badan oo cusmaan uga imaanayay muslimiintii gobolada dalka ku noolaa ay uga cabanayeen barasaabyadii goboladaas oo intooda badan ay qaraabo dhaw ahaayeen cisman ayuusan sidii larabay uga jawaabin, ilaa arrintii ay gaarto in ay koox katimid Masar oo ka cabanayay Ibnu abii sarax kadibna waa kabadalay oo waxa uu booskiisii u magacaabay maxamed bin abii bakar al sadiiq raali bayna ku noqdeen sidaas bayna ku tageen laakiin nasiib daro jidka ayay waxa ay kula kulmeen nin wada warqad la leeyahay waxa ay ka timid cusmaan oo shaambadii madaxtooyada wadata fariintaas oo sheegaysay in barasaabkii hore lasoo ceshay markaas ayay fariintii iyo fariinwadihiiba ula yimaadeen cisman, khaliifka ayaa ku dhaartay in uusan warqadaas qorin laakiin qiray in ay xafiiskiisa kasoo baxday, waxaana xafiiskiisa shaambad-haye u ahaa Marwaan Bin Xakam oo ay ilma adeer ahaayeen cisman, kadibna waxa ay dhaheen ninkaas nagu wareeji aan waajibkiisa marinee, Cismaana waa diiday, murankaas oo ugu damabyntii ku dhammaaday in isagii iyo qoyskiisiiba la dilo.

Arrinta Cismaan uu qaraabdiisa uu xukunka ugu dhiibay kama ahayn lacag jeclaysi, waayo waa la ogyahay in Cismaan uu xoolihiisa islaamka uhuri jiray amaano uu dayacayna kama ahayn ee waxa ay ahayd in shaksiyada khaliifku ay ahayd mid xishood badan aadna

udabacsan waana midda keentay qaraabadiisa in ay kaga faaidaystaan oo qaybtood ahaayeen raggii ugu caqliga badnaa Quraysh.

2. Dagaal sokeeye ilaa heshiis.

Dilkaas kadib waxaa umaddu ku caana-shubtay oo doorteen Cali, marka laga yimaado Mucaawiya oo kaliya iyo qayb aan badnay saxaabada oo iyagu arrintaan dhexdhexaad ka istaagay, inkastoo Mucaawiya ay markasta ay ka go'nayd in uu xukunkaas gacanta ku dhigo haddana waxaa saxaabada qayb kamid ah markii Cali ladoortay kadib ay dalbadeen in shaqada ugu horaysa ee dawlada ay noqto in la xukumo dilayaashii Cisman arrintaas oo inta badan saxaabada iyo Caliba ay rumaysnaayeen in ay ka horrayso in muslimiinta la isku aadiyo oo dib usheshiisiin bulsho lasameeyo kadibna arrintaas loo soo jeesto waxaana ka mid ahaa saxaabada Cali arrintaas kaga aragti duwanaa Caa'isha, Subayr iyo Dalxa.

Arrintaas ayaa waxaa ka dhashay ismari'waa markii dambe gacan kahadal gaaray, ilaa la isku afgartay in la heshiiyo, waxa ayna labada kooxood iska soo saareen cid matasha oo heshiisiisa, Cali waxa uu doortay Abii Muusaa al shacari oo ahaa saxaabadii dhexdhexaadka ahayd Calina aysan isku qoys ahayn, Meesha uu Mucaawiya doortay Camar Binu Caas oo arinta awalba daraf ka ahaa Mucaawiyana isku reer ahaayeen, waa halka uu Xasan Al Basri kaleeyahay “ Abaa Muusa waxa uu ahaa nin aakhiro doon ah halka Camar Bin Caas uu ahaa aduunyo doon “ ugu damabyntii waxaa lasoo jeediyay in Cabdulaahi Bin Cumar xilka loo dhiibo oo laga dhexqaado labadoodaba, arintaas waxaa diiday Mucaawiya, bal sida taariikhdu sheegayso waxa uu Mucaawiya isku dayey in uu laaluusho Abii Muusa al ashcari sidoo kalana soo xuuraamiyo Cabdulaahi Bin Cumar in uu xilka rabo iyo in kale.

Arrinta khilaafka keentay waxa ay ahayd dilkii Cusmaan sida uu Ibnu Taymiya leeyahay dagaalku waxa uu ahaa dagaal sokeeye .

Marka laga yimaado arintaas waxaa jirtay in ree Banii Umayya ay damac wayn klalahaayeen maamulka umadda ilaa ay gaartay in ay dilaan cid kasta oo ay islamaayeen khatar buu idinkuyahay sida Dalxa oo xataa iyaga lajiray, sida uu Ibnu Xaja ka soo weriyay in ibnu casaakir uu xadiis saxiixa laga wariyay Qays⁴

Arintaas waxa ay ugu dambayntii ku dhammaatay heshiis iyo tanaasul loo tanaasulay Mucaawiya.

3. Heshiis ilaa boqortooyo.

⁴ Siyar aclaamu al nubalaa juska 1aad bogga 35-36aad

Heshiiskaas ayaa waxa uu ahaa mid bilow u noqoday in markii ugu horraysay musliinta ay dawladnimadoodii ka leexato wadadiis qummanayd oo uu xukunka af-gembi iyo xoog ku qabsado markaas oo musliintii laba daran kala dooro noqotay in umadu gasho dagaal sokeeye oo aan lagaran doonin Meesha uu ku dambeeyo iyo in ay ka tanaasulaan xaqooda asalka ahaa iyo qiyamkii lagu dhisayay dawladnimada ayna doorbidaan in ninkaas lala heshiiyo.

Laakiin mucaawiya waxa uu arrinta sii dilay oo dawladnimadii islaamka oo markaas afarta adinba beeshay naftii kasii qaaday markii uu xukunkii uga tegay wiilkisii sidaasna uu ugu qoray shahaaddi dhimashada.

G. Burburkii qiyamka siyaasiga ahaa ee islaamka

Xasan Al-Basri ayaa waxa uu kusoo koobayaa labada musiibo ee islaamka ku habsatay in ay tahay

1. Arintii uu Camar Bin Caas sameeyay ee ahayd ku gabashada kitaabka xilligii dagaalkii Safayn oo hadduusan saa samayn waxbadan laga gaabsan lahaa .
2. Iyo dhaxalsiintii Mucaawiya wiilkiisa kadib markuu qaatay taladii Muqiira Bin Shucba.

Ibnu Taymiya iyo qayb kale oo culimada ah waxa ay qabaan in Mucaawiya kahor fadhigii garnaqsi ee dagaalkii Safayn ka dambeeyay in uusan damac kaga jirin xukunka, laakiin arrintaas waxaa beeniyay sida laga weriyay Abii Muusaa Al-Ashcari in Mucaawiya uu usoo qoray warqad uu Abuu Muusaa ugu balan qaadayo hadduu u qiro xukunkiisa sida Camar Bin Caas ugu qiray uu wiilashiisa midna uu Kuufa u dhiibayo midna Basra u dhiibayo, dankasta uu sheegtana loo oofinayo waxa uuna ku yiri warqadaan gacantaydaan kusoo qoray ee gacantaada iigu soo qor yacni cidkale yaysan ogaan arrintaas Abii Muusaa waxa uu ugu jawaabay haddaan saas sameyo xaggee Ilaahay ka galayaa⁵ .

Xilliga uu warqaddaas soo qorayo waa xilligii abuu Muusa Al-Ashacari iyo Camar Bin Caas laga dhigay laba garyaqaan oo garta gooya, sida muuqatana mid gacanta ayuu ku hayay midka kalana waa kuguda jiray.

Marka uu ogaaday in meesha nin saddexaad soo baxayna oo ah Cabdulaahi oo uu dhalay nin muslimiintu aad ujeclaayeen oo dhammaan labada qayboodba ay isku waafaqsanaayeen ayuu waxa uu udiray Camar Bin Caas si uu ugu soo xoraamiyo “ Camar ayaa ku yiri Cabdulaahiyow saxaabadii nabigana waa tahay amiirna waa ku

⁵ Siyar aclaamu nubalaa juska 2aad bogga 396

dhalay dadkuna waa ku rabaane maad bahashaan qabato, Cabdullaahi waxa uu ku yiri uma baahni, markaas ayuu ku yiri haddaba maad aqoonsatid qofka ay dadka badankiis wataan haddaad sa samaysana abaal buu kuu haynayaa xoolo iyo dhulba waa ku siinaya kuwaas oo aad ka ab ka ab caruurtaadu ku daansha daanshoonayaan, markaas ayuu Cabdullaahi xanaaqay oo yiri iiga bax guriga hooge mardamabana ha iisoo galin diintayda siisan maayo xoolihiina waxaan rabaa in aan Ilaahay anoo nadiifa la kulmo.

Waxaa sidoo kale cadayn ah in Mucaawiya markii uu xukunka lawareegay oo dawladii isugu aadday in uusan u dhaqaaqin arrintii murankaba dhalisay oo ahayd dalkii Cisman.

Haddaba arrintaas uu saxaabigaaas way nee Mucaawiya ku dhaqaaqay ee ahayd in uu xukunkii qaab aan aahayn qaabkii islaamku jideeyay kula wareegay, markii dambana uga sii daray oo uu wiilkiisa ku wareejiyay waxa ay si rasmi ah udishay oo meeshaas ku afgoysay qiyamkii siyaasiga ahaa ee islaamka ilaa ay gaartay heer ay quluubta muslimiintu ka saaraan in marlabaad la heli karo dawladnimadii nabigu ka dhisay jasiiradii carbeed. Waana Meesha uu ka lahaa taabiciigii waynaa Xasan Al-Basri “ haddaysan dhaxal uga dhigeen ilmahooda waxa ay ahaan lahayd talo-wadaag ilaa qiyaamaha “⁶

H. Awooddii oo amaanadii ka xoog badatay.

Waxaan shaki kujirin in Mucaawiya uu ahaa qof ku habboon in uu qabto xukunka Muslimiinta, waxa uu ahaa hoggaamiye weliba fahansan qaabka carab loo maamulo, sidoo kalana waxaa kula jiray Camar Bin Caas oo ahaa dadkii carab ugu caqliga badnaa, waxa uu ahaa maamul yaqaan in mudaana ku dhex jiray shaqad iyo u adeegidda bulshada islaamka labada ninba waxa ay kala haysteen labadii gobol ee ugu waynaa goboladii muslimiinta oo ahaa Masar iyo Shaam waana tuu lahaa Imam Dahabi “ Alla fiicnaan lahaydaa haddii uusan wiilkiisa uga tageen xilka oo uu umadda udayn lahaa in ay cidda ay rabaan doortaan”⁷

Qiyamka islaamiga ah oo ku dhisnaa isku dheeli tirka amaanada iyo awoodda ayaa kadib dagaalkii Safyn waxaa meesha ka baxay amaanadii waxaana adkaatay awoodii waxa uuna miisaanku noqday ciddii awood leh dadka ha maamusho.

I. Foodadii oo sharcigii ka xoog badatay.

Meesha uu islaamku ka jideeyay saraynta sharciga oo haddii ay umaddu isqabato in Ilaahay iyo rasuulkiisa loo noqdo, ayaa taas badalkeed dhaqanka carbeed ahaa in dagaal lagu kala baxo oo aan la isku nixin qofkuna xaqqiisa uu ku heli karo awood, waxa aad

⁶ Dhahabi , taariikh al islaam wa wafayaat al mashaahiir wal acclaam juska 5aad bogga 272

⁷ Siyar acclaam al nubulaa juska sadexaad bogga 158

moodaana in maahmaahdaan ay soo koobayso dhaqankii carbeed “ nimaan shantaa kaa reebin sharci kaama reebo “.

Waxaa mudanna in la kala saaro labadii dagaal ee saxaabada dhexdooda ka dhacay midii waa “ Jamal “ dagaalkaas waxa uu ahaa mid ku dhacay si aan kutalagal ahayn doodda u dhaxaysay Caa'isha , Dalxa iyo Subayr oo dhan ahaa, iyo doodda u dhexaysay Cali iyo inta badan saxaabada oo dhinac ahaa, waxa ay ahayd dood ku saabsan waa in la dilaa dilayaashii Cusmaan oo ay qabeen kooxda hore iyo in aan hadda la dilin ee dib u heshiisiin bulsho lasameeyo oo ay qabeen kooxda dambe, Meesha dagaalkii safayn uu ahaa dagaal watay damac siyaasi ah oo dhiigga Cusmaan loogu soo gabanayo.

J. Boqotiyayntii dawladnimadii islaamka

Arimahaas aan kor kusoo sheegnay waxaa ka dhashay in dawladnimadii islaamku ay noqoto mid qiyam ahaan ka duwan tii nabigu ka tagay, waxaana ay dhaxashay nidaamkii dawladnimo ee uu Islaamku la dagaalamayay, nidaamkaas oo kudhisnaa kala saraynta bulshada iyo in hoggaamiyuhu sida uu isagu rabo wax u maamulo, waxaa Meesha kabaxay sarayntii sharciga, waxa ay bulshadii u qaybsan tay bulsho dabaqad hoose ah iyo dabaqad sare oo iyagu dadka iyo dalkaba say rabaan wax umaamula, waxa ay dawlanimadii Islaamku la mid noqotay tii Beershiya iyo Roomanka oo uu nabigu ka digay.

Waxaa mudan in la caddeeyo in dhimashadii khaliifkii Cali kadib, qaabkii uu kula wareegay xukunka Mucaawiya uu ahaa qaab aan waafaqsanayn nidaamkii Islaamiga ahaa ogolaanshaha ay saxaabadu ogolaadana uu ahaa mid ku yimid laba daran kala dooro iyo in wadanka uusan gelin dagaal sokeeye oo aan la garanayn meesha uu ku dhammaan doono.

Waxaa tusaale kuugu filan mar uu Marwaan Bin Xakam warqad u diray Mucaawiya oo uu leeyahay in Xuseen uu kabaxay balantii iyo aqoonsigii madaxtinimadiisa ayaa Mucaawiya warqad uu arrintaas ku weydiinayo usoo diray Xuseen, Xuseen oo u jawaabaya ayaa yiri “ inkastoo aan Ilaahay hortiis wax cududaar ah ka haysan ka joogista ladagaalnaaga haddana diyaar uma ahi in aan kula dagaalamo ama aan ku khilaaf, waxaad se ogaataa in aysan jirin fitno muslimiinta uga wayn in aad xilka hayso adigu “⁸

Sida ay saxaabadu qaab maamulkii Mucaawiya uga soo horjeedeen waxaa daliil kuu ah in markii uu damcay Marwaan Bin Xakam in uu aqoonsi uraadiyo Yaziid Bin Mucaawiya oo uu aabihii ucaleema saaray madaxtinimada umadda dhimashadiisa kadib ayaa waxa uu yiri hala aqoonsado Yasiid waa sunno ay nooga tageen Abuu Bakar iyo

⁸ Ibnu casaakir taariikh al dimishiq juska 14aad qaybta 206

Cumar, markaas ayaa waxaa istaagay oo Meesha joogay Cabdiraxmaan Bin Abii Bakar oo yiri “ waa sunno aad ka dhaxasheen Qaysar iyo Hirigle “ goobtaasna waxaa joogay Caa'isha iyo saxaabo kale oo waawayn wayna ku raaceen ⁹

Astaamihii Riddadii siyaasadeed.

Bulshadii Muslimiinta waa ay ka guulaysteen Riddadii diimeed ee dhacday dhimashadii Nabiga kadib, waxay se ku guul-darrayseen ka hortaga riddadan siyaasadeed ee cusub.

Waxaan qaybtaan ku soo xiraynaa waxa ay mufakiriintii Islaamku ka dheheen arrintan ugubka ah.

Ibnu Taymiya :- waxa uu aaminsanaa in xukunka boqrtooyadu uu ahaa mid daruuro keentay balse aysan aahayn mid diinta raad kuleh laakiin ugu yaraan lagu dedaalo in qiyamkii kale la fuliyo haddii uu isagu sifo aan sharci ahayn ku yimid, waxa uuna qoray buug dhan oo uu cinwaan uga dhigay "boqrtooyada iyo khilaafada" sida magaca buugga ka amuuqatana waxa uu kala saaray labadaas arrimood¹⁰ waxa uu aaminsanaa in nidaamka boqrtooyad uu xaaraan ahaa.

Ibnu Khaldun : waxa uu la qabay isla fikirka Ibnu Taymiya iyaga oo weliba aan isku casri iyo juqraafi ahayn, “ dawladnimada islaamku waxa ay ahayd mid ku dhisan wadadii nabiga ilaa ay markii dambe ay qaaday waddo kale oo ah boqrtooyo “¹¹

Mawduudi: Ibnu mawduudi waxa uu sida uu buugiisa khilaafada iyo boqrtooyada ku caddeeyay in ay labadaas nidaam aad u kala fogaayeen Meesha khilaafadu beecadu ay ka horaysay doorashad oo marka ay muslimiintu la mubaayacoodaan khaliifka ayuu sharci noqday halka boqrnimadu ay marka hore sharci noqonaysay kadib dadku lagu qasbayay in ay ogolaadaan. ¹²

Cabdi salaam Yaasiin : sida uu ku sheegay buugiisa oo xambaarsan isla magaca khilaafada iyo boqrtooyada ayaa waxa uu mar uu ka hadlayay qaabkii ay fuqahadii xilligaas joogtay wax u arkayeen yiri “ hadalka dhahaya hoggaamiyaha xoog wax ku qabsada oo awoodda lawareega hala adeeco waa fatwo ku dhisnayd labadaran mid dooro ee ma ahayn mid kudhisan sharci waana mid ay fuqahadaas dareensanaayeen aadna ay uga hadleen waayo waxa ay door bideen midnimada umadda” ¹³

⁹ Ibnu athiir , al nihaaya fii qariib al athar juska 4aad bogga 205

¹⁰ Boqrtooyada iyo khilaafada bogga 30aad

¹¹ Ibnu khaldun , al muqadamah 261

¹² Muuduudi , khilaafada iyo boqrtooyada bogga 49,61,51,52,58

¹³ Cabdisalaam yaasiin , buugga khilaafada iyo boqrtooyada bogga 66aad

2. saamayntii dawladdii Beershiya ee nidaamkii siyaasiga ahaa ee Islaamka :

qoraagu marka uu arrintaan ka hadlayay uu hordhac uga dhigay hadal laga weriyay mid kamida wasiiradii dawladii Cabbaasiyiinta oo la dhihi jiray Al-Qaasim Bin Cabdalah sida uu soo warinayo Shaadi Al-Muqani; anaga oo la joogna Qaasim Bin Cabdalah oo cabaya ayaa waxaa lagu dul akhriyay buuggii Ardashiir markaas ayuu inta la yaabay yiri wallee isagaaba ka fiican waxa ay leeyihiin Al-Baqra iyo Al-Cimra “ sida ka muuqata qisada waxa ay madaxda muslimiintu gaareen in dhaqankii iyo qoraaladii asaasihii dalwdii Beeshiyaanka Aradashiir uu agtooda kaga fiicnaa nidaamkii islaamiga ahaa.

Waxaan shaki kujirin in islaamku aad uga faa'iiday furashadii dawladdii Beershiya oo uu ka dhaxlay aqoon iyo ilbaxnimo wayn oo qarniyo badan soo jirtay laakiin taas badalkeed waxa ay nidaamkii islaamiga ahaa ku noqotay culays aad uwayn oo ciriiriyay, ilaa uu markii dambe ka xoog batay oo ay madaxdii islaamku marjic ka dhigteen nidaamkii cusbaa ay la kulmeen.

Arrintaan ayaa ahayd mid xitaa inta badan qorayaashii iyo mufakitiintii islaamka ee nooleed xilligii Cabbaasiyiintu ay aad umuujiyeen sida ay ugu saamoobeen dhaxalkii uu katagay boqrkii Ardashiir ilaa ay markii dambe carabi loo badalay buugiisii loo yaqaanay “ balantii ardashiir “ oo ahaa dardaaran uu uga tegay wiilshiisii oo uu ku barayay qaabkii ay u maamuli lwhaayeen dawladdii uu dhisay oo uu waqti badan ku baxshay saysan gadaashiis dawladaasi u burburin, buugga ayaa ka kooban 25 bog waxaana ay iyada oo dhamaystiran ku qoran tahay juska 1aad ee buugga “ tajaarub al umam oo uu qoray Maskiweeh “

Buugga ayaa gaaray heer uu xataa yeesho qudsiyo ilaa uu noqdayba marjica kaliya ee nidaamka siyaasiga ah ee dawladdii Cabbaasiyada, waxa uu noqday cashar loo akhriyo madaxda iyo dhaxal sugayaasha, waana boos uusan xataa gaarin buugga “ waber “ ee uu qoray miikaafiili

Hadaba maxaa ugu muhiimsanaa waxyaalihii uu buugaan xambaarsanaa

1. Ardshiir iskuma arag in uu bani aadam kasoo jeedo ee waxa uu aaminsanaa in uu Ilaah kasoo jeedo oo ay dhaleen Ilaahyo, waxa uu aaminsanaa in boqoradu ay Ilaahyo yihiin, waxa uuna aaminsanaa in xukunka uu yahay mid uu ka dhaxlay Ilaahay ee uusan ahayn wax bani aadam ku shuqul leeyahay, fikraddaas ayaa markii dambe waxa ay si dadban u gashay nidaamkii islaamiga ahaa sida aad ku arkaysid buugga “ altaaj , aadaab al suldaaniya , iyo buugta uu qoray Ibnu Muqafac"

2. diinta oo loo adeegsado in ay boqorka u shaqayso, meesha nidaamka islaamku ay diintu ka shaqayso danta dadka ayaa taas badalkeed Ardashiir waxa uu diinta u adegsan jiray in ay ka shaqayso ilaalinta xukunkiisa wax kasta oo xukunkiisa ilaalinaya diinta ayay kamid ahayen waxkasta oo xukunkiisa lid ku ahna diinta waa laga saarayay, waana midda saamynwayn kuyeeltay ilaa ay gaartay in boqorka loo sameeyo axaadiis beena oo lagu fariisinayo hadba baahida khaliifka, ilaa ay taariikyahannadu ay sheegaan in fikradii uu aaminsanaa Ma'muun ee ahayd "abuurista quraanka" ay ahayd mid uu ka dhaxlay buuggaas Ardishiir, waana midda keentay in Ma'muun markii uu la dardaarmayay macalinka wiilkiisii Waathiq uu yiri quraanka iyo Ardashiirba udhig.
3. Kala sarraynta bulshada : waxa uu aaminsanaa in madaxdu ay kasarrayso buslahada inteeda kale kana fadli badan tahay waxa uuna uqaybshay bulshada afar qayb oo say uka horreeyaan u kala fadli badan, intaas uga ma uu harine dadka soo haray ayaa Iyana afar loo kala saaray dabaqadda Diinta , dabaqadda Ciidanka , dabaqadda Lataliyaasha , dabaqadda Adeegayaasha oo ah inta soohartay oo uu iyagu laftigooda la sii kal saaray.
4. Arxan la'aanta siyaasadda : Aradshiir waxa uu ku bilaabay xukunkiisa in uu laayo dhammaan xubnihii qoysaskii uu xukunka kala wareegay si uu xukunkiisa u adkeeyo waxa uuna kula dardaarmay in hogaamiyaha uusan ka tagin cidkasta oo sheegan karta sharciyada xukunka ilaa uu dilo mooyee

Haddii aysan ahayn dabeecaddii carbeed ee ahayd mid aan si fudud uga tegin diinta iyo adayga iyo dhammaystirnaanta diinta islaamka iyo nidaamka islaamiga ah , sidoo kale masuuliyadii weynayd ee ay isa saareen fuqahadii islaamku waxaa dhici lahayd in meesha ay ka bixi laahyd qiyamkii islaamka.

Laakiin waxa uu ahaa mid marwalba ku jiray qalbiga maslimiinta waxa ayna dareensanaayeen in nidaamkaan cusubi uu yahay mid aan sal iyo raad kulahayn ee dantu ku kalliftay mar uunna laga noqon doono.

Qaybta 3aad : kabixitaanka qaacida “ labadaran kala dooro”

Muslimiintu iyaga oo haddana arrintaas marwalba ka doorbidayay in la ilaasho midnimada islaamka ayaa haddana waxa kaliya ooy tanaasuleen ay ahayd qiyamka 1aad oo ahaa in madaxtinimadu ku imaato wadatashi laakiin aysan ka tanaasulin qiyamkii kale, waxaana taas ku dareemi in ay jireen kacdoono fara badan oo ay horkacayeen saxaabadii Nabiga ay na uga soo horjeesteen nidaamkii boqrnimo ee uu katagay Mucaawiya waayo waxa ay ogolaadeen ayaa ahaa in Mucaawiya uu dalka maamulo maadama uu ku dhagay laakiin markii ay hawshii fogaatay inta badan saxaabadii iyo fuqahadii muslimiintu waa diideen waxaana ka mid ahaa kacaanadaas kii uu horkacayay Xuseen Bin Cali , Cabdalah Bin Subayr , Sulaymaan Bin Sarad, oo saddexduba ahaayeen saxaabadii Nabiga , sidoo kale kacdoonkii fuqahada uu hogaaminayay faqiihii waynaa Cabduraxmaan Bin Ashcath oo ay kaga soo horjeedeen dulmigii Xajaaj, kacdoonkaas oo uu saxaabigii waynaa Anas uu taageersanaa oo hadduusan cimrigiisa oo aad uwaynaa ka reebin uu ka qayb qaadan lahaa .

Haddaba qofka dhahaya boqorka lagama hor imaankaro xataa hadduu daalim yahay waa fuqaho meel uga dhacaya dhiigii iyo fahamkii saxaabadaas shahiidayay iyaga oo raadinaya dib usoo celinta karaamada iyo qiyamkii umadda oo god dheer ku dhacay.

Waxaase sooyaalkaas ay culimadu markasta ku dadaalen in sharciyada ay xukaamtaas haysteen ay ahayd mid ku dhisan qaacidada ah dani ku badday iyo labadaran kala dooro, waxa ayna badanka fuqahadaas isku raaceen in ay tahay mid diinta kasoo horjeeda lakiin sida qofka gaajaysan loogu banneeyay in uu bakhtiga oo xaaraan ah cuno ayay muslimiintu ku ogolaadaan maamulka hogaamiyahaas xoogga iyo baadda ku qabsaday xukunka, sidoo kalena waxa markasta meesha yaalay oo ay inta badan fuqahadaas baneeyeen in qiyamka ah in umaddu iska qabato dulmi wadaha uu ahaa mid markasta taagan oo aanan boqorka looga aabayelayn in uu waxa uu rabo sameeyo, wakaa Imam Axmed kasoo horjeestay dulmigii iyo baadilkii uu waday khaliifkii Cabaasiga ahaa ee keenay in uu quraanku yahay makhluuq ilaa uu xabsi ugalay, waana Meesha uu kalahaa Ibnu Xajar “ in laga hortago oo kacdoon looga horyimaado boqoradda qooqay waa madhabka salafka laakiin arrintu waxa markii dambe ku fariisatay in la iska daayo iyada oo laga baqayo in arrintu noqoto kud ka guur qanjo uguur “ ¹⁴

Inkastoo ooy ugu dambayntii dhaxalsiisay dawladnimadii islaamka burbur baqdintii laga qabay in lakala tago , waana midda Cabdixamiid oo ahaa boqrkii ugu dambeeyay uu markii laga dalbaday in dawladii Cusmaaniyada loo badalo qaab dastuur ah oo goboladii adraaftu xuquuq ugaara yeelanayaan nidaamka dawladda oo ahaa nidaam qadiimana la

¹⁴ Ibnu xajar al casqalaani , tahdiib al tahdhiib juska 2aad bogga 288

badalo oo qaab konfadaraal ah loo guuro uu diiday isaga oo sabab uga dhigay in uu fawdo kabaqayo laakiin taasi ay dhaxal siisay in dawladiiba burburto, waana midda qabsatay dawlada islaamka ee hadda jira ee markii laga kari waayay war nidaamkiina wax ka beddela oo umada dulmiga ka daayaa ay diideen iyaga oo ku andacoonaya awood la aan waa burbur ilaa ay qaybtood burbureen oo maanta aysan dawlad lahayn, waxaana tusaale kuugu filan dawladeenna Soomaaliya oo haddii madaxwayne Siyaad Bare dareemi lahaa doonista dadka iyo in aysan diyaar u ahayn xukun dambe ee uu maqli lahaa taladii aqoonyahankii Maanafeesto qaban lahaa doorasho waxna ka beddeli lahaa nidaamkii siyaasiga ahaa ee dalka ku maamulayay ma burburteen dawladnimadeenii oo 30 sano kumaan jirneen burbur iyo wareer.

Haddaysan dhacdeen dhacdadii uu Maxamed Buu Casiisi naftiisa ku gubay waxa ay ahaan lahayd masalada kacdoonka iyo ka hortaga hogaamiyaasha qooqay ee xoogga kujooga wadamada islaamka mid aan cidna iswaydiin umadduna ay iska aqbasho “ arintaas marka uu qoraagu ka hadlayo waxaan aaminsanaa in kacaankii umadda Soomaaliyeed ay uga hor imaadeen dawladii Siyaad barre uu bilow u ahaa helitaanka dawlad leh qiyamkii islaamka inkastoo kacdoonkaas uusan helin cid cilmiyaysa dhibaataadii ka dhalatay oo xanuun badnaydna ay ilowsiisay bulshada Soomaaliyeed hadafkii markii horaba laga lahaa kacaankaas, waana midda keentay in hadda dadku ay mar labaad u hanqal taagan nidaamkii Siyaad Barre gaar ahaan dhalinyarada”

Kacdoonkii carbeed ama waxa looyaqaan gu'gii carbeed waxa uu ahaa bilow ay umaddu dareentay culayska heeryada saran waxa ay noqotay bilow iyo wado dheer oo cagta la saaray sidii dib loogu raadin lahaa dawladnimadii wanaagsanyd ee aannu nabiga ka dhaxalnay, waxa oo kale ay umadda tustay sida ay u tahay dhalanteed dawladnimada hadda ka jirta dawlada islaamka aysan ahayn dawlado ku dhisan jacayl ee ay tahay mid ku dhisan cabsi galin, markii ay cabsdii meesha kabaxdayna si fudud ayay ku burburtay.

Waxaan dhihi karnaa kacaankaas bilowday 2010 waxa uu ahaa mid shucuubtu ay marlabaad gacantooda kusoo celinayaan xaqii ka dhumay xili hore , waana midda dhammaan dawladihii uu ka dhacay kacaanku dadku ka dhigteen hal-kudhig ereyga “ dadku waxa ay doonayaan “

Side loo soo celin karaa oo looga bixi karaa dhibtaas

Laga yaabee in xillaga ay hadda marayso gu'gii carbeed ay tahay mid u eg xilligii ay maraysay kacaankii faransa 1815 xiligaas oo ahaa markii ay kala baahday kacaankii Faransa Yurubna ay gashay xaalad wareer iyo isku dhexyaac ah.

1. qaab kacaan ah

Haddaba waxaa hubaal ah haddii uusan Ilaahy faraj kale u furin in kacaanka carbeed ee billowday 2010kii ku dhammaan doono saddex arrimood midkood :

- waddo dheer oo ah tii uu maray kacaankiii Faransa, dad badan ay ku dhintaan wadankuna ku burburo laakiin ugu damabayn dawladnimo xor ah xalaal ah ay dhalato
- waddo gaaban oo boqortooyooyinku caqliyaystaan waana waddadii ay martay bqortooyadii ingiriisku waana waddo si gaara ugu furan wadamada islaamka ee boqortooyooyinka ah waxaana mooddaa waddadaas in ay hadda kusocoto haba noqto gaabise Maqrib
- wadda saddexaad oo ah in uu dhaco af-gembi ciidanku lasafto shacabka kadibna dhiso dawlad sax ah sida uu sameeyay Suwaar Al-Dahab ee suudaan “ qoraagu waxa uu ku dari lahaa in kastoo baqdin badan laga qabo in kacaanka suudaan oo ka dambeeyay qorista buuggaan uu isna uu hada kusocdo wadadaan , sidoo kale waxaan dhihi karaa in tuunus ay ciidanku haysteen fursad ay dalka kula wareegi karaan khalkahl ku galin kareen kacaankii guulaystay markii uu baxsady bin cali bal taas maysameen waana midda aan isleeyahay wadadaan ayay hadda kus ocotaa “

su aasha ayaa ah in sidii ay garteen boqradii maari iyo ninkeedi wilyam 13 kii febraayar 1689 taas oo ay ku saxiixeen wathiiqadii dasturiga ahyd oo ay badalkeed uga taansuleen inta badan awoodoodii sidaasna y ku soo kordhiyeen aduunka musdalaxa bqortooyada dastuuriga ah ama boqortooyada la ogol yahay sidaasna ay kusoo gabagabeeyeen dagaalo kacdoono iyo dhiig daadanayay in kabadan afar qarni ilaa ay ay kaga daydeen wadamadii kale ee yurub, tallow madaxda iyo janaraalada hogaansha wadamada islaamka ah ee badankood xoog iyo ku tagrifal awoodeed ku haysta wadamadooda ma qaadi doonaan wadadii ay qaadeen maari iyo wilyam, ma ka badbaadin doonaan wadamadooda iyo dadkoodaba dhiig data afar qarni mise waxaan ilaah ka barinaa in uu mar uun noo keeno madax dadka u naxda kana tanaasusha dulmiga ay umadda ku hayaan.

Taariikhduse waxa ay nabartya in si kasta oo kacaanada bulshadu bilowga hore u khasaaraan in ugu dambayn ay guushu raacayso waataas kacaankii ingiriiska ee la

mooday in uu fashilmay qarnigii 17aad guulaystay 1688, si lamid ah burburkii kacaankii faransa uu ugu dambayntii dhaxalsiiyay dhisitaanka dawlad loo dhan yahay.

Wada kasta oo ay kudhamaataba dawladnimada islaamka ee casriga ah waxaa laga maar maan ah in ay ku imaato hal wado oo ahw adadii ay kutimid tii koowaad taas oo ah heshiis bulsho iyo dawlad lawada leeyahy laguna dhisay qiyamkii aan kor kusoo sheegnay ee 16ka ahaa laguna hawl galiyo qiyamkii hawlgalinta ahaa ee 14 ka ahaa, waxayna ku hirgali kartaa umadda oo qiyamkaas u badala qaab dastuur ah oo sidaas ku noqdo mid leh saraynta 1aad

Waana marka shaqadaas lagu jiro laba caqabdo oo qabsan karta dhisidda dawladnimadaas laga tigtoonaado kuwaas oo ah :-

- in ay umadu yeelato nidaam dawladeed oo casri ah laakiin waafqsan qiyamka islaamka tixgalinayayan shucuurta bulshada diinta iyo dawladan kal saryn sidaasna Meesha looga saaro nidaamka ay rabaan qayb kamid ah mufakiriinta ku saamoobay nidaamyada kale ee aan la juqraafi iyo dabeecad ahayn wadamadeena “ Cal maaniyiin”
- in Meesha laga saaro aragti ay sawirayaan in badan oo kamid ah culimada iyo mufakiriita gaar ahaan kuwa unasab sheegta madrasada salafiyada oo ay aamin yihii dawlad kasta oo islaamku ama wadamada islaamku yeelanayo in ay noqoto mid tixraacda tii boqrtooyooyinkii soo maray ilbaxnimadii islaamka laga bilaabo tii mucaawiya ilaa tii cabdi xamiid al thaani.

Ugu damabyntii qoraagu isaga oo suuragalnimada arintaas cadaynaya ayaa waxa uu qiyamkii 30 qiyam ee qaybta 1aad kusoo sharaxay u badalay qodob dastuuri ah, oo loo diyaarin karo qaab heshiis bulsho oo noqonkara heshiis u dhexeeya bulshada dhexdeeda , dawlada dhexdeeda iyo bulshada iyo dawlada dhexdeeda sidaasna uu qofkasta ku ogyahay waajibaadka saran iyo xuquuqda uu leeyahy.

Gabagabada buugga ayaa dhihi karnaa cilmi baaristaan waxa ay gaartay qodobadaan soo socda :

1. waxa ay cadaysay in nidaamka siyaasiga ah ee islaamku uu hodon yahay sunada iyo quraankuba ay si cad uga hadleen qiyamka islaamiga ah ee ay u baahntahay dhisitaanka iyo hawlgalinta dawladnimada islaamka.
2. In taariikhdii ay soo martay dawladihii islaamku ay ahaayen kuwo aan ku dhisnayn qiyamkaas uu islaamku hodon ku yahay aysana mudnaynin tix raac laga dhigto.
3. In damiirka muslimku uusan waligiis ogolaan dulinimada si kasta oo uu si kumeel gaar ah u aqbalay isaga oo ka duulaya laba daran midkod dooro laakiin waxa uu

ahaa mid markasta dareensan in dulinimadaas laga baxo dibna loogu noqdo dawladnimadii nabigu nooga tagay.

4. In sida kaliya ee taariikhdaas madow looga bixi karo oo lagu heli karo ay tahay in laga gudbo qaacidada ku dhisnayd laba daran kala dooro , iyo cabsida laga qabo in ay fitno iyo dagaal sokeeye dhaco iyada oo taas badalkee loo noqnayao in dib boorka looga jafo qiyamkii ay kudhisnayd laguna ahwlgalinayay dawladnimadii islaamka ee ku ekayd xiligii khaliifkii 4aad cali bin abii daalib iyada oo qiyamkaas loo badalo qaab heshiis bulsho ama waxaa loo ayqaan hadeer qodob dastuuri ah.

Gunaanadka

Ugu dambayntii akhriste buug koobistaas aan ku sameeyay buuggaas aadka muhiimka ugu ah marxaladda ay marayso nidaamka siyaasiga ah ee islaamka oo ah marxalad kala guura lana mid ah tii ay maraysay xilligii la un kayay dawladdii Umawiyiinta oo uu nidaamka siyaasiga ah galay marxalad labaad oo ah mid aan waafaqsanayn nidaamka iyo manhajkii nabi Muxamed, runtii waxaan dhihi karaa waa buug ay mudan tahay in uu akhriyo qofkasta oo soomaali ah oo danaynaya in uu maalin uun qayb ka noqdo siyaasadda dalkeenna waayo waxaa isku ekaansho wayn ka dhexeeyaa sooyaalka ay soo martay dawladnimada islaamka oo aad mooddo in mararka qaar uu buuggu ka hadlayo sooyaalka Soomaaliya waayo waxa ay soo martay saddex sooyaal oo kala ah:

1. Ka hor nabi Muxamed oo ay jasiiradii carbeed ka jirtay waxa uu qoraagu ugu yeeray boqortooyo lamoodyadii oo ahaa in odayaal dhaqameedyo badan isku dayeen in ay dhisaan nidaam dawladeed oo u eg kuwii ka jiray hareerahooda , si taas lamid ah waxaa dalkeenna ka hor gumaystaha ka jiray boqortooyo lamoodyo ay odayaal dhaqameedyo badan isku dayeen in ay dhisaan nidaam dawladeed oo u ekaa nidaamkii dawladihii waa waynaa oo ay Cismaaniyadu kamid ahayd ee kajiray hareeraha soomaalida sida tii Majeerteeniya , Ajuuraanka , Galladiga , Warsangaliga iyo kuwii kele ee lamidka ahaa
2. Marxaladdii Islaamka ee nabigu ka so baxay jasiiradii carbeed , marxaladaas oo ahayd marxalad ay carabi lakulantay nidaam dawladeed oo aysan aqoon laakiin ahaa nidaam dhamaystiran nasiib darrose nidaamkaas uu Meesha kabaxay markii uu xukunka xoog ku qabsaday Mucaawiya sidaasna ay ku bilaabatay dawlado aan sal iyo raadba kulahayn nidaamkii islaamiga ahaa, si taas lamid ah ayaa Soomaaliya waxaa halmar la wareegay gumaystihii isaga oo u dhisay dawlad casri ah oo aysan soomaalidu aqoon ulahayn laakiin hanaqaaday dadkuna aqbaleen laakiin waxa ay Iyana burburtay markii uu xukunka xoog kula wareegay siyaad bare “ labada tusaale qaab ahaan ayay isugu egyihiin ee kama wado in nidaamkii

dawladnimo ee gumaystaha iyo kii nabi muxamed baa isku mid ahaa ee waxaan kawadaa in labada nidaam ay wadaageen in labada qolo ee lagu maamulayay waa carabtii iyo soomaalidee ay ahaayeen dad aan horay ugu baran nidaam dawladeed “

3. Marxaladda saddexaad ayaa ah marxaladda ay bulshadu isku dayaysay in ay dib u hantaan dawladnimo ku dhisan heshiis bulsho oo ah mid ku timid wadatashi iyo is ogol waana marxaladda ay soo mareen wadamada carabta welina ay kujiraan in kastoo aanu tan uga horraynay wadamadaas carbeed haddana waxaad moodaa in aanan gaarin wali natiijadii iyo hidiilihii ay qabeen shacab waynaha Soomaaliyeed oo si cad ugu qornaa bayaankii lagu asaasay ururkii xornimo doonka soomaaliyeed SYL.

Anoo ka duulaya isku ekaanshaha labadaas umaddeed oo marka dhan laga fiiriyo hal ummad ah haddana waxaan mar labaad ku boorrinayaa aqoonyahanka Soomaaliyeed ee raba in ay ka raadiyaan xalka dib udhisidda dawladnimada Soomaaliya dhankaas iyo Galbeedka oo ahayd meeshii markii horaba wareerku nooga yimid in ay dhankaan usoo jeestaan oo sida uu sheegay qoraagu dawladnima kasta oo la rabo in ay Soomaaliya ka dhalato waa in ay noqtaa mid laga ilaashay laba arimood ba:

1. Fahanka calmaaniga ah ee aaminsan in diinta islaamku khatar ku tahay dawlanimada soomaaliya, taas badalkeed aanu dawladnimada casriga ah ee dadka Soomaaliyeed oo ah dad unasab sheegta diinta islaamk ay fahmi karaan ay tahay mid ku dhisan qiyamka 30 ka ah ee qoraagu buugiisa ku sharraxay iyada oo aan isleeyahy haddi loo beddelo qaab qodobbo dastuuri ah in lafgaarayo hiigsiga umadeena.
2. Fahanka culimada taqliidiga ah ee islaamka ee labada madrasaba waa tan salafiga oo aan halkaan ula jeedo dhammaan xarakaadka Soomaaliyeed oo ay xataa kamdi yihiin kuwa unsabsheegta Ikhwaan Muslimiinka iyo Suufiyadaba, kuwaas oo sawirka ay ka haystaan dawladnimada islaamku uu yahay dawladihii boqortooyoyinka ahaa ee islaamka soo maray kuwaas oo sida uu qoraagu buuggiisa si cilmiyaysan ugu sheegay in aysan sal iyo raadba kulahayn, sawirkaasna uu yahay mid ka dhashay dhaxalkii ay nooga tageen fuqahadii islaamka ee lakowsaday xilliyadaas kuwaasoo ku saleeyay fiqigooda baahiyihii taagnaa xiligaas iyaga oo u dilay qiyamkii islaamiga ahaa iyaga oo akduulayay labadaran kala dooro ilaa markii dambe axkaamtii ka dhashay kala doorashadii adkayd ee ay fuqahadaas kujireen la moodo in qaabka xukunka islaamkuba yahay sidaas

Waxaan sidoo kale akhristaha rabaa in aan dareensiyo in qormadaan aysan ahayn tarjumaad aan buugga kusameyay balse ay tahay akhrintaydii buugga iyo fahankii aan ka qaatay iyo koobitaan aan kusameeyay aragtiyadii ugu muhiimsanayd ee uu buugu xambaarsanaa, aanna kula talinayo in markasta sida ugu fiican ay tahay in aad buugga dib u akhriso.

Maxaan ka faa'iiday akhrinta buuggaan.

Runtii waxa uu ii sahay akhrinta buuggaan in aan ku dhiirrado akhrinta buug kale oo ka hadlaya isla cinwaankaan ama ku udhaw oo oo Iyana waqtigooda aan sidaan ookale usoo kobi doono, waxaanse qofkasta oo Ilaahy awood usiiyay kula talinayaa in buuggaan sidii uu soomaali ugu bedelli lahaa u qalab qaato.

Waxaan kaaga tagayaa ugu dambayntii in qormadaan aan kusoo koobay buugga intii awooddayda ah aysan ka dhignayn in aan dhammaan aragtida qoraaga ku raacsanahay balse ay tahay qiraal aan qirayo muhiimadda uu buuggaan u leeyahay, dib udhiska dawladdnimada Islaamka, sidoo kalana uu qayb wayn ka qaadan karo dadaalka aan ugu jirno helitaanka dawladdnimada soomaaliyeed.

Waxaan kuu rajaynayaa kahraste wanaag dhaantiis waqtigu hakuu wacnaado.

Dhammaad.

Sakariye Axmed Maxamed

Garoowe, Puntland, Soomaaliya

Wednesday, April 8, 2020